
# siyaasadda dejinta & ujeeddooyinkeeda









Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Wasaaradda Warfaafinta & Hanuuninta Dadweynaha

Oktoobar 1976

# SIYAASADDA DEJINTA iyo Ujeeddooyinkeeda

—o—

*Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha*

*Muqdisho Oktoobar 1976*



*Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya*
*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*



*Wasiirka Dawladda ee Warfaafinta iyo Hanuuninta*
*Dadweynaha Jaalle Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## TUSMADA BUUGGA


— *Arar*

— *Abaarta heshay Soomaaliya*

— *Siyaasadda dejinta*

— *Ujeeddada dejinta*

— *Ujeeddada dambe ee dejinta dadka dhulalka xeebaha ah*

— *Dhaqan geddinta degdegsiimada leh ee si wacan uga hirgashay beelaha danwadaagta*

— *Faa'iidooyinka laga helay dejinta*

— *Qorshaha loogu tala galay horumarinta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda*

— *Barnaamijka Dejinta Beelaha Danwadaagta Kalluumaysatada ee Xeebaha Soomaaliyeed*

— *Habka maamulka Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumaysiga*

— *Dhismaha Wakaaladda Beelaha Danwadaagta*

# A R A R

*Kaddib markii ay Soomaaliya ku guuleysatey tallaabooyinkii taariikhiga ahaa ee Gargaarka Abaarta oo taabba galka noqday 1974 - 1975kii, badbaadisayna dad tiradoodu gaareyso 1.000.000, oo qof (hal malyan) waxay si geesinnimo leh ugu tallaabsatay 18kii Juun 1975kii, rariddii dadkii ku jirey Xeryaha Gargaarka Abaarta, taasoo soconeysay 45 casho, waxeyna noqdeen kuwii nasiibku ku kaalmeeyey in ay ku waaberiistaan carrada cusub ee beeraha iyo xeebaha, dad lagu qiyaasay 120.000 qof. Iyadoo ay doorteen 15% xeebaha dadkii ku jirey xeryaha; 54,2% beeraha, 28% waxey ku laabteen miyi iyagoo ay xoolo u hareen. Waxaana halkaa ku hirgalay fikrad siyaasi ah oo dhaxal gal noqotay, wax badanna loo aayi doono.*

*Siyaasadda ka dambeysana dejinta dadka Soomaaliyeed ee dabeecaddu dacbarraysay waxay tahay mid ujeeddooyin fara badan leh kuwo guud iyo kuwo gaar ahaaneedba, salkana ku haysa straateejiyad xeeldheer oo wax badan socon doonta, faa'iidooyin fara badana dalka u soo jiidi doonta; waxayna leedahay hab wax u qabasho dad iyo dalba, ama fulin siyaasad kacaan oo ku hubeysan fikrad Hantiwadaagnimo, ama ku habeysan daryeel Bani aadaminimo, iyo badbaadin ummadeed, sida ku cad xaashidii Koowaad ee Kacaankii curtay 21kii Oktoobar 1969kii, kuwaasoo ahaa in laga beddelo Bulshadatan dhibaha ka haysta xagga dambaynta, oo loo helo bulsho qaadata hab hor u kac lagu gaari karo, iyadoo laga dhisayo dalka bulsho ka bed-qabta dhibaatooyinka, gaajada, jahliga iyo jirrooyinka, kuwaasoo ah cadowyada Bani-aadamka.*

*Waxaana cad in uu yahay Barnaamijka ka hirgalay Soomaaliya mid ah curad ay ku dayan doonaan dawlado badani ee adduunyada saddexaad; isweydiinna meyno in aanu hirgaleen barnaamijkaasi haddii aanu dhalan Kacaanka Oktoobar ee Hantiwadaagga ahi, waayo waa la wada ogyahay arrintu sida ay ahayd markii ay dhacaan abaaro, ama dhibaatooyin kale dalka soo food saaraan, hase ahaatee waxaa sii kaalmeeyey Idiyolojiyadda Hantiwadaagga oo ah tan dhalin karta kicinta dadku u kacaan daryeelka ummaddnimo.*

*Dejintuna waxay leedahay ujeeddooyin dhaqan; siyaasad, waxbarasho iyo mid dhaqaalaba, waxaana la doonayaa in looga faa'iideysto xoogga Dadka iyo Khayraadka Dhulka ku jira labadaba; Ummadda Soomaaliyeed boqolkiiba 70% waxay yihiin Reer Guuraa xoola Dhaqato ah, oo dhinac keli ah ka kaba Dhqaalaha; hase ahaatee waxaa maran dhinacyo badan oo kale oo u baahan wax ka qabasho.*

*Siyaasaddeennuna waxay tahay in laga faa'iideysto Beeraha, Kalluunka, Macdanta, iwm. iyo dhinacyo kale oo aan la taaban, sidaa daraaddeed ayey lagama maarmaan u noqotay in dib loo habeeyo dejinta dadka si loogu qaybiyo, beeraley, xoolaley, kalluumeysato, ganacsato iyo dad la baro xirfooyin kala duwan oo ku dhisan aqoon. Waxaana loo habeeyay Beelaha Danwadaagaha si ay iskooda isu-maamulaan iskuna fillaadaan mustaqbalka, isla mar ahaantaana ka kabaan dhaqaalaha dalka dhinaca wax-soo-saarka beeraha iyo kalluumeysigaba, waxaana loo sameeyay beelahaa in ay saldhig u noqdaan dejinta loo samayn doono dadka reer baadiyaha ah oo weli ku nool miyiga iyo wixii culays ku haya magaalooyinka.*

*Ugu dambeystii Dejinta dadka xoola Dhaqatada ahi waa siyaasad loo qorsheeyay in lagu socdo hadda wixii ka dambeeya; laguna rajo weyn yahay in laga gaaro guul, oo si wacan la isugu dheelli tiro dadka deggan Miyiga iyo kuwa Magaalooyinka, Beeraha, Xeebaha, oo ay giddigood ka wada qayb qaataan Kordhinta Dhaqaalaha dalka.*

*Qorshaha loo sameeyayna dadkaa wuxuu u habeysan yahay si u suuragelineysa in ay dad badani ku soo biiraan Beelaha Danwadaagta waqtiga loo baahdo*

*Jaalle Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

*Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha*

# ABAARTII HESHAY SOOMAALIYA

Ma ahayn Soomaaliya kelideed tan Abaarta xumi heshay 1974-75kii, Sida aanay u ahayn khasaaradii soo gaartay mid iyada u gaar ahayd, hase ahaatee waxaa la wadaagay dhibahaa Dawlado badan oo Afrika ugu badan.

Ma ahayn Soomaaliya keligeed midda dhadhamisay kharaarka dhibaha dabeecaddu keentay oo dhaawacyo xun gaarsiisay dhaqaaleheedii iyo noloshii dadkeeda, yeelkadeede waxay keli ku ahayd waqtigaa oo u gaar ahaa habka ay wax uga qabatay, ama kaga hortagtay dhibaatooyinkii ka dhashay kadeedka abaarta middaas ayaana muujisey kartideeda iyo magaceeda, maamuuskeedana kor u qaaday.

Afrikada Galbeed waxaa helay Abaaro dad iyo duunyaba waxyeelleysey oo ka dhigtay dad badan oo aad u ladnaan jirey cayr sabool ah, dad fara badanna ka qaxisay dhulkii ay degganaayeen markii ay u adkaysan waayeen guuldarrada adaygga, naxariis-darrida abaarta, ama dac darrida iyo leelleelka ay kala kulmeen halkaa; ayaa ku khasabtay inay ka tagaan beerihii ay falan jireen iyo dhulkii ay xoolaha ku raacan jireen ilaa waqtigii la is abuuray. Waxay ku kalliftay Hijrad khasab ah oo aan Afrika soo marin.

Adduunyada oo dhammina waa u gurmatay gargaarka Dawladaha Saaxil Hase ahaatee arrinta Soomaaliya waxay kaga duwanayd taas dhinacyo badan, ha ahaato sida looga hortagay dhibaatooyinka dabeecadda; ama sida wax loogu qabtay dadkii ku tabaalooby halkaa, ama xalliga fiican oo laga gaaray arrintaa.

Waxeyna noqotey J.D.S. Dawladda keliya ee adduunweynaha tustay oo si geesinimo ah ugu tallaabsatay dhibaato sidaa u weyn oo aad u qallafsana oo si wacan wax uga qabatay Kumana ekayn arrinta ay ku tallaabsatay mid ku siman wax ka qabasho, ama ka hortag keliya eewaxay u sameysey qorshe wax lagaga qabanayo mustaqbalka dhibaatooyinka dabeecadda oo sanooyin badan soo noq-noqonayey, si ay ugu hesho xalli kama dambeys ah, kaasoo daryeelaya reer guuraagii xoola dhaqatada ahaa; si ay uga baxaan leelleelkaa wax badan soo haystay, arrintaasina waa dhabowday Ilaahayna waa la garab qabtay.

Aqoonyahannada Cilmiga dabeecadda, ku xeel dheeri waxay la socdaan waxyaabaha keena dhibaha dabeecadda, iyo hadba meelaha ay baabi'iso adduunka, khatarta ka dhalata, dhawrkii sanaba mar, hase ahaatee abaarihii helay Soomaaliya sanooyinka 1817kii, 1847kii, 1855kii, 1911kii, 1929kii 1950-51kii, 1969kii, 1974-75kii waxay kaga duwanaayeen abaartii ugu dambeysey sababo badaan darteed haba ugu horreysee waxaa is-helay mar keliya roobab waayid, biyo xumo ,baad La'aan iyo jirooyin la socday abaarta.

Lama arag, lamana maqal, lamana soo sheegin hadda ka hor Taariikhda Soomaaliya Beelo dhan oo wada cayroobay oo aaney u harin neefba, xata Awrtii gurgur, iyaga ayaa ugu horreeyey xoolaha aafadu heshey, middaas ayaana uga darrayd wax walba; oo ku noqotay laba dhibood culeyskeed, ama dedejisay cayroowga iyo xeryaha gargaarka u soo cararka si ay lafahooda u badbaadshaan, kaddib markii ay wax walba ka quusteen, ilaa ay gaareen heer ah inay ka dhaqaaqeen xoolohoodii goor subax ah markii ay ka quusteen oo arkeen in aaney wax yididdiilo lahayn, meeshii ayeyna ku dhammaadeen.

Waxaana Xukuumadda Kacaanka Soomaaliyeed u suura gashay, kaddib markii ay gargaartay dadkii cayroobay, oo xeryo xannaaneyn ah u furtay in ay ku dhaqaaqdo sidii ay wax dhaxalgal ah ugu qaban lahayd dadkaa tabaaloobey; waxayna go'aan ku gaartay kaddib markii si wacan loo dersay oo talooyin badan laga soo jeediyey in la dejiyo meel uga wanaagsan, miyiga iyo noloshii ay ku noolaayeen ee kadeedka ahayd wax badan. Markaa ayaa go'aan lagu gaaray in la dejiyo dhulal xeebo ah iyo meelo beero laga fasho si ay u noqdaan kalluumeysato iyo beeraley, ma guurto ah; waxayna noqotay taladaasi mid lagu dhaqaaqo tii ugu faa'iido badneyd Soomaaliya ilaa hadda.

Sidaas daraadeed ayey Labada Gole go'aan ku gaareen arrintaa iyada ah 1dii Juun 1975kii, (Golihii Sareee Kacaanka iyo Golihii Xoghayayaasha), waxaana lagu dhaqaaqay bishaa dhexdeeda tabaabushihii raridda dadkaa lagu qiyaasay RuB-UC MALYUUN qof iyagoo loo qaybiyey Beeraley iyo Kalluumeysato Koox waliba sidii ay dooratay.Waxaana la faray 22

Hay'ad iyo Wasaaradood in ay fuliyaan go'aanka Raridda iyo Dejinta, kuwaasoo u qaybsaday Shaqada hadba sidii ay ugu kala toostay ama ugu kala habbonaayeen, laga bilaabo gaadiid iyo sahay diyaarin, taakulayn, Hannuunin;kuna dhammatay meelayn dhulka la dejin lahaa, iyo sii diyaarin hawlihii ay qabsan lahaayeen.

Waxayna qaadatay Hawsha Rariddu muddo ku dhow 2 bilood. Waxyna 20kii Agoosto 1975kii rasmi ahaan u dhammaatay hawshii rariddu iyadoo lagu qiyaasay dadkii la soo raray in ay ka baxeen habeen dhaxi iyo loxoska; wuxuuna ahaa xuskii ay Soomaaliya sameysey 20kii Agoosto 1975 oo la isugu soo baxay Fagaaraha Ciyaaraha Benaadir, mid ay ku muujineyso; libta ay ka gaartay arrintaa ay ku tallaabsatay, si wacanna wax uga qabatay; iyadoo siisay dadkii ka qayb galay Hawshaas Abaalgudyo muujinaya tixgelin sidii wax looga qabtay; waxaana wax weyn naga taray Hawsha Rarida Dawladda Midowga Soofiyeeti; waana looga mahad celiyey.


Arrinta dejintuna waxay salka ku haysaa siyaasadda Dawladda eeku saabsan daryeelka danaha Dadweynaha, taasoo ku cad Xaashida Kowaad ee soo baxday 21kii Oktoobar 1969 kuna, saabsan in laga abuuro Dalka Bulsho Soomaaliyeed ee ku dhaqanta caddaalad, sinnaan iyo wada noolaansho iwm., taasina ma suuragasho in ay ka hirgasho Bulsho Reer Guuraa Xoola Dhaqato ah qaarkeedna ay jahli, jirro iwm ay haysato qaarka kalena fursad u haystaan in ay horkac sameeyaan dhinac kasta oo ku xiran noloshooda mar haddii ay ku nool yihiin magalooyin aad loogu dadaalayo daryeel wacanna haystaan, Sidaa daraaddeed ayaa lagu dadaaley in laga gudbo Marxaladdaa Tallaabooyinka laga qaaday Dejinta Dadkaa Cayroobay.

Waxaanna oran karraa shaqooyinkaas dawladdu ay ka qabatay Gbollada Abaareysan in ay noqon karaan qaar ah in ay ku habboon tahay adduunka intiisa kale inuu kaga daydo.


Waxaannuna oran karnaa in ay tahay tallaabo hor leh oo laga qaaday sidii dhulka aan beernayn looga faa'iideysan lahaa. Dhinaca Kalluumeysiga isagu qudhiisu waxaa uu yahay mid guul weyn laga gaari karo, waayo dalkani waxa uu leeyahay xeebo aad u dheer.

Run ahaantiina wuxuu yahay dalka ugu xeeb dheer waddammada Carabta oo weliba baddiisu ay dihin tahay oo aan la manaafacaadsan barwaaqadii ku jirtey, sidaas darteed ayaa loo abuuray Ummadda Cusub oo isugu jirta Beeraley iyo Kalluumeysato, mashruucaas kalluumeysiguna waxa uu yahay mashaariicda ugu fiican ee ay ku manaafacaadsan karan dadka Xeebuhu ee Abaaruhu taabteen, fursaddana u helay in la dejiyo dhul dihin oo aan looga horreyn.

Waddammada Hantigoosadka ah iyo waddammada warshadaha leh labadooduba aad ayey ugu baahan yihiin dalalka beeraha iyo kalluunka leh indha badanna way ku eegayaan, taasna macneheedu waxay tahay waddammadaas warshadaha lihi waxay u baahan yihiin cuntada beerahaas iyo dhulkaas ballaaran, caalamka oo dhammina haatan waxaa uu raadiyaa meel ay ka helaan xoolaha nool iyo cunto iyo wixii la mid ah.



*Xarun ka mid ah xeryihii gargaarka abaarta*



*Geeddi laga raystay*

# SIYAASADDA DEJINTA

Haddii ay tahay dejintu dad meel laga soo raray oo meel kale la keenay waa mid caadi ah, hase ahaatee arrinta dejinta ee Soomaaliya ku tallaabsatay 1975kii, waa ka qotadheer tahay inta; waana ka qiima weyn tahay dhinac kastoo loo eegaba xag waxtar, xag waddaninnimo, ama bani' aadaminimo,iyo xag wax-qabashaba, sidaas daraddeed ayey leedahay Falsafad dhaxal gal ah oo qoto dheer, salkana ku haysa taariikh la taaban karo, sida ay u leedahay STRAATEJIYAD guud oo dambe, mana aha arrinta dejinta dadkii tabaaloobay soo rariddoodu mid ah u rug doorin, ama u danayn gaar ahaaneed ee waxay leedahay wajiyo badan oo kala duwan; kuwo guud, iyo kuwa gaar ahaaneedba waana ka sarreeysaa wax-u-qabasho dad yar, ee waxay gaarsiisan tahay heer wax-u-qabasho dad iyo dal, sida ay u tahay fulin siyaasad Kacaan ah oo ku habeysan daryeel Bani' aadaninimo iyo badbaadin Ummadeed sida ku cad xaashida Koowaad kuna qorrayd Ballanqaadkii Kacaankii Oktoobar 1969kii, kaasoo ahaa: in laga bedelo bulshadatan dhibaha ka haysta xagga dambeynta , iygoo loo daneynayo in loogu bedelo hab leh Horuc ama loo dhiso Bulsho ka bed qabta dhibaatooyinka Gaajada, Jirrada, Jahliga oo ah Cadowyada Bani'aadamka, sidaa darteed ayey ahayd arrinta ku tallaabsiga dejintu fulin siyaasad dawladeed ee waqtiga hore la tilmaamay, iyo in wax laga qabto guuldarrooyin haystay dad badan oo Soomaaliyeed kuna noolaa miyiga, si looga badbaadiyo dhibaatooyin soo noq-noqon jirey muddo kaddib, oy dabeecaddu keento; wax ka qabashadeeduna waxay ahayd Bilow lagu guulaystay arrintaa muddada dheer lala hifanayey, lana waayey wax ku dhaca Kacaanka ka hor; ama awood u leh (Hela) in ay culays saaraan si ay wax uga qabtaan nasiib darrooyinka dabeecadda, sidaas daraaddeed ayey libtu u raacday Dadkii ku dhaqaaqay fulinta arrintaa ku xirrayd nolosha Dadkkaas Soomaaliyeed.

*Straatejiyada*

Straatejiyada fog oo laga leeyahay dejinta danteedu waxay tahay in la kala duwo nolosha iyo dhaqanka dadka tirada badan oo ku nool Baadiyaha kuwaasoo gaarayey 70% si loogu

qaybiyo xoolaley; beeraley, Kalluumeysato ganacsato deggan magaalooyinka dalka, iyo kuwa ka shaqeeya xirfadaha kale, taasina waxay beddeleysaa habkii xoola-raacnimada ahaa iyo Awrka geeddiga ah oo rarani astaanta u ahaa ee Soomaaliya lagu yiqiin sida ka muuqata garaafka tirada dadka. Si ay markaa u noqdaan kooxaha Bulshada aan tilmaannay ma guurto; ka geddisan habkii hore oy ku dhaqmi jireen, taasoo dhibaato u keentay dhaqaalaha Dalka meelo badan oo dihinna dhaawacday; sida xeebaha oo aan wax quman oo kalluun ah lagala soo bixin (3330 mayl badeed); dhulka beeraha ah (8 mayl oo Hegtaar) oo wax yar laga manaafacaadsado; hana sheegin waxa ku jira dhulka hoostiisa; marka waa u muuqata qof kasta dhibaatada ay u keeneyso dalka iyo Dadka, Dad badan oo meel ku wada urursan xirfad la'aan. Marka si looga gaashaanto taas ayaa loo fuliyay stratejiyadaa in kasta oo uu kaalmeeyay waqtiga ku soo beegmay oo wixii laga cararaayey yimaadeen, markaa ayaa la raacay taatikada aan soo sheegnay.

yeelkadeede waxaa jirta in Abaartii cusleyd ee Dalkeenna 8 gobol oo ka mid ah saameysay, ay lug ku lahayd doorashadii waqtiga Dejinta; laakiin aaney ahayn sababtii keentay.

Waayo waxay u muuqatay in ay suura gal tahay bulsho ku jirta heerarkii bilowga ahaa ee nolosha sida tan reer Guuraaga sooma sida oo kale in ay u gudbi karaan habka hantiwadaagga iyagoo aan soo marin qaababkii ka horreeyey ee

dhulgoosiga iyo hantigoosiga, iyo isbeddello iyo calaamooyin fara badan oo loogu yiqiin in ay tahay lagama maarmaan in la soo maro inta aan la soo gaarin heerka abuuridda Bulshada Hantiwadaaga. Waxaana caddaatay in ay jiraan dalal badan oo ay ka mid yihiin Mongooliya iyo Jamhuuriyado ka mid ah Midowga Soofiyeeti...

(Usbekistaan, Kirgiisiya, Kasaakhistaan) oo bulsho reer guuraaya ahaa ayaa tijaabadaa soo maray oo maanta hantiwadaagga ku caana maala.

Barnaamijka dejinta ee maanta ka hirgalay Soomaaliya waa curad ay ku dayan doonaan adduunyada saddexaad. Isweydiinna meyno in barnaamijka dejintu aanu hirgaleen Kacaanka Oktoobar ee Hantiwadaagga ahi haddaanu jirin. Waa-

yo Idiyoolojiyada Hantiwadaagga weeye tan dhalin kartaa kicinta dadku ay u kacaan daryeelka ummadda.

Arrinta dejintuna waa arrin taariikhi ah marka la eego horukaca bulshada adduunka. Reer guuraanimaduna waa marxaladda ugu horreeysa ee ay soo martay nolosha bulshada. Haddii loo dhabba galo nolosha reer guuraaga, waa mid taagan oo dabraysa horukaca dhaqaalaha iyo dhaqanka bulshada. Waana yar tahay iswydaarsiga dhaqaale ee ay leeyihiin reer guuraagu.

Tan kale dejinta dadka xoola raacatada ahi waa siyaasad loo qorsheeyay, in lagu socdo mustaqbalka; laguna rajo weyn yahay in laga gaaro guulo; oo si wacan la isugu dheellitiro dadka deggan miyiga iyo kuwa magaalooyinka, beeraha oo ay giddigood ka wada shaqeeyaan kobcinta dhaqaalaha.

Dejinta ka hor waxaa loo xil saaray kooxo farsamo yaqaan ah, dersid, soo baarid, iyo qorshaynta dhulka, kharajka iyo jaangooyin hab maamulba.

Barnaamijka dejintana waxaa loo kala saaray :-

1. Mid khuseeya dadka xeryaha gargaarka abaarta ku jiray, waqtigaa kuna kooban sidii wax loogu qaban lahaa (oo suura gal ah) isagoo kala ahaa :-

   b) Diyaarin, daadgureyn dad.

   t) Xarumo nasasho u sameyn.

   j) Ku soo dhoweyn xarumaha cusub, taakuleyn aqallo u dhisid iwm.

   x) U diyaarin tababarro farsamo.

   kh) Hawl gelid iyo qaayibid dhul.

2. Barnaamij ku saabsan dadka la dejin doono mustaqbalka kaasoo ku habaysan qorshayn tifaftiran mar haddii ay siyaasadda dawladdu tahay (1) In la dejiyo dad badan oo soomaaliyeed oo ku nool miyiga hadda — 2 — dadka magaalooyinka wax la'aanta isku

hor tuban si looga baxo dhibaatooyin wax badan haystay.

Culayskana waxaa loo saaray xeebaha iyo beeraha iyagoo loo arko labadaa meelood in ay yihiin kuwo aan sidii la rabay looga faa'idaysan ilaa hadda; hase ahaatee waxaa aad loogu rajo weyn yahay in ay kaalinta laga sugayo buuxiyaan kaddib markii si xoog leh fiiro gaar ah loogu yeeshay oo mashaariic lagaga faa'idaysanayo labada meelood laga hirgeliyay.

3. Waxaa kale oo la dejiyay kaddib markii meel la isugu keenay dad badan oo ku kala noolaa jasiirooyin yar yar ah oo kala fogfogaa; kuna yaal koonfurta magaalada Kismaayo iyagoo ay ku adkayd in ay helaan wixii ay u baahan yihiin : Biyo, Raashin, Daawo, Gaadiid iwm.

Marka si loogu helo waxyaalahaas oo dhan, loona daryeelo ayaa la isugu keenay dhul weyn loona magaaleeyay, kadeedkiina looga saaray.

*Ujeeddada Dejinta :*

Sida hadda ka hor la tilmaamay, ujeeddada dejinta waa in laga abuuro beelaha dan-wadaagta beeralayda iyo kalluumaysatada, bulsho muruq maal ah, oo la soo baxa waxey cuni lahaayeen isla markaana dhisaya dalka; ka qayb qaadanaya u dhidbidda tiirarka dhaqaaleheeda

Bulshadaasi waxey ku wada noolaanayaan sinnaan caddaalad, barwaaqo iyo horumar, is-garabsi iyo iskaashi sidii ay wax u wada qabsan lahaayeen; si loo gaarsiiyo heer ay isku fillaadaan; iskood isu-maamulaan oo wax walba u qabsadaan, kuna qaybsadaan waxey soo saaraan sida loo kala karti badan yahay, ama loo kala hawl karsan yahay, iyadoo uu qaadanayo qof waliba wax la'eg (u dhigma) hawsha uu qabto; waxaana halkaa ka abuurmaya bulsho hantiwadaag dhab ah; oo tiirar mudanaysa isla markaana tirtireysa kala sarreynta iyo iskudul noolaadka; iyadoo lagu qiimeynayo qofka kartidiisa; xilkasnimadiisa, is-dirkiisa iwm.

Kuma ekaan doonto dheefaha ay soo saaraan, soo saarayaasha keliya ee waxey ku fidayaan si toos ah ama si dadban beelaha bulshooyinka kale; waayo beelaha hantiwadaagga ahi waxey ku dhaqmaan manaafacaad qaybsi; waxeyna ka mid tahay taasi arrimaha ay kaga wanaagsan yihiin bulshooyinka hantigoosadka ku dhaqma.

Waxaana arrintaa aad u sii caddeyn doona qaybta ka hadleysa, habka maamulka, sida ay u shaqeeyaan, isumaamulaan, talooyinka u goostaan amarrada u fuliyaan iwm.

Waxeynuna u gudbeynaa sababha dhaliyay dejinta waxaana ka mid ah :

1 ) Qarnigan 20aad ee dalkastaba higsanayo in uu gaaro horumar degdeg ah; ma suura geleyso in la daawado ama laga indha laabto bulsho dadkeeda 70% yihiin Reer Guuraa miyiga ku nool; oo dhibaatooyin fara badan qaba, hase ahaatee ay qaadaneyso waqti dheer oo aan la sugi karin, sidii wax loogu qaban lahaa.

2) Ma suura galeyso in la fiirsado dhaqaale ku xiran reer guuraa xoola dhaqato ah oo dabeecaddu xukunto; wax

badan ay qabsan karaanna gacmaha ka laabanaya sababo kale darteed.

3 ) Waxaa dhici karta abaaro la mid ah tii heshay dalka 1974 — 1975, ama kasii daran taasoo ay adag tahay in laga gargaaro lafahooda halista ku jira - noloshooduna had iyo goor waxay khatar u tahay dhibo aaney waxba ka qaban karin, amase ay adag tahay in wax weyn mar walba soo qabto ee arrintu u baahan tahay mar keliya oo culays la saaro sidaa ayaana lagu dhaqaaqay oo lib laga gaaray.

4) Waxaa lagu talo jiraa in la qorsheeyo dhaqaalaha dalka oo dadka loo qaybiyo in ay ka shaqeeyaan warshadaha, beeraha, xoolaha, kalluumeysiga, ganacsiga, iwm.) Taasina waa adag tahay in la suura geliyo mar haddii dadka dalka oo tira yaraa markii hore misana ay ku nool yihiin 70% iyo ka badanba miyiga.

5) Dad ku nool miyi oo kala firirsan waxaa adag sidii loo gaarsiin lahaa tacliin, daawo iyo wixii kale oy bulsho u baahan tahay, haddii aan la ururin. Iyadii ayaana lagu dhaqaaqay lana wadi doonaa.

Iyadoo la dersay sababahaa oo dhan ayaa xukuumadda kacaanka Soomaaliyeed ku dhaqaaqday sidii loo dejin lahaa reer guuraaga oo ay uga bixi lahaayeen haraadkii, kadeedkii geeddiga iyo dac darradii ay ku jireen.

Mana aha tallaabadaasi mid sahlan; waxayna ku lug leedahay dad ku noolaa qarnigii 15aad ee la soo gaarsiiyay qarnigii 20aad.

Waxaana lagu baraarujinayaa dhibaatooyinka dambayntu u leedahay maskaxdooda, caadooyinkooda iyo heerka adduunweynuhu marayo. Iyadoo kooban tallaabadaasi waxay tahay dagaal waqtiga lala dagaallamayo habeen iyo maalin oo la isaga gudbayo labada nololood oo kala fog; guushuna waa hubaal — maxaa yeelay muraadka laga leeyahay dejinta waxa weeye noloshii reer guuraaga oo ku dhisnayd ABAAR, OON, KUL iyo kadeed laga baxo, oo loo sahmiyo dadkaas meelo nolol cusub loogu abuurayo iyaga iyo carruurtooda. halkaa ayaana magaalooyin cusub laga dhisaya oo leh dugsiyo, isbi-

taallo Biyo iyo wixii magaalo lagu degi lahaa si ay uga baxaan dhibaatadii joogtada ahayd kana qayb galaan dhismaha dalka iyo kordhinta wax soo saaridda dhaqaalaha.

Sida la og yahay dhulka Soomaaliya waa dhul ballaaran oo dabeecaddiisu aad u kala duwan tahay waa dhul ban, buuro iyo badba leh oo intuba u baahan yihiin in wax laga soo saaro, middaa ayaana saldhig u ah in dadka la dejiyo oo laba weji loo yeelo : Beero falid iyo kalluumeysi.

*Ujeeddada dambe ee dejinta dadka dhulka xeebaha ah.*

Siyaasadda Guud ee Xukuummadda Kacaanka Soomaaliyeed waxay ku dhisan tahay in laga faa'iideysto khayraadka badda, si la isugu dheelli tiro qaybaha Dhaqaalaha dalku ka kooban yahay (gaar ahaan) waxyaabaha lagala soo baxayo badaha, iyo dhulka Beeriddaba. Sidaa daraaddeed ayaa aad loogu daneeyey tan iyo markii kacaanku dhashay, looguna tabaabushaystay sidii wax looga qabsan lahaa. Waxaana kuu caddeynaya danayntaas magacaabidda iyo dhismaha Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda OO LOO XIL SAARAY HIRGELINTA HIMILADA kacaanka.

Waana la ogyahay in ay aad u yarayd Kacaanka ka hor ka faa'iideysiga badeheenna dhererkoodu gaarayo (333,000 Mayl Badeed) amase ay Dawlado kale si sharci darro ah u guran jireen kalluunkeenna iyagoo aan wax lib ah ugu hayn dalka; inkasta oy jiraan ilaa hadda maraakiib kalluun oo fasax la'aan uga kalluumeysata badeheenna. Yeelkadeede taasi waxay xad u yeeshay markii lagu guuleysto barnaamijka ku saabsan in la soo gado *doonyo kalluumeysi,* oo ka baahi tira Dalka Soomaaliya; waxyaabaha looga baahan yahay, dhinaca dabeyshu ka soo galeysay.

Wasaaradda Kalluunkuna waxay ku tallaabastay markii la *abuuray* inay ku baraarujiso dadka; *baahida loo qabo* in laga faa'iideysto *Badda,* waayo Kalluunka badeheennu waa xubin muhiim u ah oo kabi kara dhaqaalaha waddanka.

Waxaynuna maanta leennahay ugu yaraan *400 DOONYOOD* oo yaryar ee kalluumeysiga oo dalka u shaqeeya; taasina waa wax weyn oo waxtar ah haddii laga *eego dhaqankeenna* hore ee xoola raacnimada oo aan lahayn aqoon xirfa*fadeed,* iyo muddada yar ee sida deg degga ah wax isaga beddeleen *markii Dawladdu garatay* in laga faa'iideysto badaha, kaddib markii abaaro xun ka dhaceen dhulkeenna miyiga ah xoolihiina yaraadeen; oo la gartay in la dejiyo dhulka xeebaha ah, dadka cayroobay, si ay ugala soo baxaan khayraadka ku jira halkaa. Waxeyna noqotay tab lagu mahadiyey.

Dhinaca kale haddii laga eego Ujeeddada dambe ee lagga leeyahay dejinta dadka tabaaloobay dhulalka xeebaha ah waxay tahay in laga xoreeyo dhaqankii xoola raacnimada oo la dhabeeyo *fikraddaa* ay wax badan ku taahi jireen dadka Soomaaliyeed in kastoo *habku ka duwan yahay,* maxaa yeelay dadkaa la dejiyey looma sameyn qorshe ka horreeyay dejintooda, iyadoo ay ahayd dejin lagu tilmaami karo «KEDIS» ama khasab maxaa yeelay looguma tabaabushaysan sidii la rabay ee waxay lahayd hab *gargaar dejin ah,* oo dani kugu khasabtay lagu sheegi karo, HASE AHAATEE DIB KA SOO hagaagtay, sida Wasiirka Kalluunku caddeeyey.

*Xaqiiqada* ujeeddada *dejintuna waxay ku kooban tahay in la abuuro dad noqda urur isbahaysta oo abuuraya dhaqaale, Hantiwadaag, oo siinaya nin waliba wuxuu goostay, waxayna leedahay taasi dhaqan* Isbahaysi. Danwadaagtuna waxay tahay iskaashatada iyadoo leh dhaqan, wax-wada-qabsi waxaana ka dhexeeya doonayaha, shabaagta iyo qalab kasta *oo kalluumeysiga loogu dhaqmo.*

Dantuna waa in loo abuuro dadkaa ahaa reer guuraaga horumar iyo mustaqbal ka wacan koodii hore, mar haddii *ilbaxnimo* aanay ka horreyn dejinta Bani'aadamka; waayo ma helayo caafimaad; wax-barasho danayn kale qofku haddii uu reer guuraa yahay. mar haddii ay dejinta tahay heer ilbaxnimo oo dawlado yar kali ahi garteen. Waxaa lagu dejin doonaa dadka hadda kaddib qorshe loo habeeyay oo loogu tala gelayo taasoo lagu dhaqmi doono mustaqbalka barnaamijka loogu tala geli doona Dejinta.

Qorshaha loogu tala galay horumarinta Beelaha Danwadaagta kalluumeystadu wuxuu u habeysan yahay in shaqo *loo abuuro dadkaa OO XIRFAD: LA BARO, MARKA hore, sida shabaag dhigid, sameynteeda* kalluun qallajin, doonyo dhoobid, dabaal barasho, dukaanno gadid, digaag dhaqaalayn iwm. Middaasina waxay ku qotontaa dadka oo loo qaybiyo *hawsha.* si ay u soo wada hoyaan dhaqaale ka dhexeeya oo lagu wada manaaficaadsado.

Waxaana lagu rajo weyn yahay in ay is-cesadaan Beelaha Danwadaaggta kalluumeysatadu sanooyinka dhow haddii loo helo doonyo ku *filan kalluumeysiga; dadkuna si wacan u bartaan hawsha ku lug* leh kalluumeysiga; kaddibna lo suuq geeyo meel kasta oo looga helo Dalbasho.

Dadka Danwadaaguhuna inkasta oo laga soo nabad geliyey abaarihii misana maanta xagga dejinta kama duwana kuwa dawladdu gacanta ku hayso sida dhallinyarada Kacaanka oo kale; waxaana loo xannaanaynayaa sidaa inta Soomaaliya jirto. Waxayna bilaabeen in ay wada yeeshaan doonyo ay ku wada shaqeystaan wixii laga soo saaro baddana wadaagaan.

*Dhaqan Geddin :*

Waxaa muuqatay inay dhabowday qaar ka mid ah ujeeddooyinkii lagu dhaqan geddiyey reer guuraaga kuwaasoo laga arkayo maanta beelaha Danwadaagta Xeebaha, nin ahaa reer Guuraa xooladhaqato ah oo muddo yar ku bartay xirfaddaa tabaheedii oo dhan, isagoo maanta aadaya badda oo kalluun ka soo jillaabaya waana arrin dhaxal gal ah oo aan la arag iyada oo kale hadda ka hor. Waxayna deg-degsanayaan Dawladda si loo soo dedejiyo wixii ka dhiman qalabka ay ku qabsan lahaayeen hawshooda kuwaasoo hadda dhismay, laguna raja weyn yahay in ay noqdaan kuwo Soomaaliya wax ka tara, ama ka kaba kaalintaa dabeyshu ka soo geleysay, wax badan ee xagga badda iyo ka faa'ideysi la'aanteeda.

Tan kale, haddii la eego hodonnimada badaha Dalka Soomaaliya, oo loo dhameystiro qalabka ay u baahan tahay waxaa cad in ay isku fillaan karto Soomaaliya mustaqbalka dhow, xagga badaha waxa lagala soo baxo amase ay kalluun badan u dhoofin karto dawlado kale oo adduunweynaha ka mid ah, oo maanta ciriiri kaga jira cuntada lagala soo baxo badaha.


*Tababarro :-*

Waxaa la siiyaa sida aan hadda ka hor sheegnay tababarro kala nooc ah oo giddigood ku saabsan kalluumeysiga iyo sidii

wax loogala soo bixi lahaa badaha dihin; wuxuuna ka bilowday war dhegeed loo akhriyo cilmiga badda.

Waxaana ku xiga barashada dabaasha, shabaag sameynta, doonyo fuulidda, kalluun cunsiinta, markaa kaddib ayaa casharrada joogtada ahi u bilowdeen, ilaa ay ka gaareen heer ay maanta Soomaaliya ku faaneyso; kumana eka casharradoodu dhaqan badeed iyo gaarsiin heer wax-soo-saarid oo keliya ee waxaa weheliya tababarro dhaqan geddis ah, qawaaniinta guud ee iskaashatooyinka ee la damacsan yahy in lagu fidiyo dalka.

Sidaas oo kale ayey tababarradu uga socdaan Beelaha Danwadaagta Beeraleyda, si giddigood loo gaarsiiyo heer ay gartaan ujeeddada loo gargaarayey; loo soo raray ama loo dejiyey dhulka ay maanta ku nool yihiin iyo ujeeddooyinka kala duwan ee looga dan leeyahay arrimahaa oo dhan.



*Doonyaha ay Danwadaagta Kalluumeysatadu ku jillaabtaan*

## DHAQANGEDDINTA DEGDEGSIIMADA LEH EE SI WACAN UGA HIRGASHAY BEELAHA DANWADAAGTA

Ma dhicin hadda ka hor in loo arko, dadka Soomaaliyeed si urursan; waayo-laguma kici jirin arrintaa iyo wax u eg toonna midna; marka maxaa ka dhashay ama ka soo baxay isukeenidda iyo is-dhex-galka dadkii ku tabaaloobay Abaartii Caymis ?

— Waxaa ka soo baxay — is maamul — wada shaqayn u halgan dano guud ahaaneed, waxaa intaasoo dhan ka faa'iido badan isku duubnaanta dadka si loo gaarsiiyo heer shaqo gelin ah; iyagoo loo diyaar gareeyay in ay noqdaan xoog wax soo saara; wax kordhiya, isla mar ahaantaana tabcada wixii ay raashiman lahaayeen, uguna talo jira in ay uga gudbaan heer dhaafsiisan kaasoo gaarsiisan isku fillaansho, iyo buuxin heer dhaqaale hadda dhiman oo abaaruhu dhaawacyo gaarsiiyeen.

Wada dhaqankana waxaa ka soo baxay inay isku si u wada arkeen danahooda iyagoo walaala ah, halkaa ayaana midnimo ka dhalatay.

*Dhaqan geddin degdeg ah :-*

Culimada bulshooyinka adduunku waxay isku raaceen baarid badan kaddib in ay dhib badan tahay sidii loo beddeli lahaa dhaqan ahaan, caadooyin ummadi wax badan ku soo dhaqmayeen oo kala dhaxleen, tiirar xoog lehna ku yeelatay bulshada; hase ahaatee; waxaa lagala kulmay dadkii laga soo raray miyiga waxyaalo ka duwan taas in kasta oy dhibaatooyin jireen, ama waaya-aragnimada laga helayna ay ka mid tahay jajabnaan, madax furaan, dhug dheeraad ah oo lagu arkay reer guuraagii, taasoo u fududeysay barasho wax badan oo dhibo lagala kulmi lahaa ee ku saabsan caadooyinka cusub ee la dhaqan-gelinayey.

Ka soo qaado dadkii ku noolaa miyiga oo aan weligood bad arag, iyo kalluun, ama fikrad xun ka haystay kalluunka iyo wixii cunaba, maxaa iska beddely geeddiga kaddib?

Marka hore — waxay u muuqdeen dad qallafsan oo aan maskaxdooda la loodin karin, hase ahaatee waxaa caddaatay muddo yar kadib in ay qaayibeen nolosha cusub ee looga abuurayo bulshada cusub; iyagoo wada qabsaday hawlihii loogu tala galay oo dhan dhinac kasta ha ahaadeene, markaa ayaa loo maleeyay in ay ka soo guureen dhaqankoodii hore, degdegsiimaha ay u dal qabteen darteed iyo sida ay u qaayibeen habkaa cusub ee laga hirgeliyay xeebaha iyo beeraha.

Tan labaad — Geel jiruhu wax xirfad ah ma aqoon; oo dhaafsiisan xoola raacnimo lagamana sugeyn; maamul wax la yiraahdana dhegtiisaba kuma dhicin, isla mar ahaantaana lama xukumin weligii, waayo duurcidla ah ayuu badanaaba wareegaa, sida ugaarta —— yeelkadeedee wuxuu noqday nin dhego waddan amar qaadanaya, hawl walba qabanaya is-illawsiiyay markii la soo raray noloshii hore, oo laga qabanayo beelaha cusub, taasina waxay caddeynaysaa isbeddelka degdegga ah oo xoogga leh ee ku dhacay noloshii dhaqankii fakarkii dadkaa iyo sida ay tilmaanta ugu tahay in dhaqso looga baxayo dhaqankii hore; iyadoo aan qaadanayn waqtiga dheer oo uu qaato isbeddelka quruumaha adduunweynaha kala hababka ku dhaqma, oo hadda ka hor sameeyay dejin dad aad u fara badan.

In kasta oy kala duwan tahay hababka lagu kala hirgeliyay.



*Dhaqan lala soo degay beelaha dejinta*

*Loolan Caadooyin :-*

Caadooyinka Soomaaliya waxaa ka mid ahaan jiray in ay xoolaleydu weligeed liidi jirtay beeraleyda ma guurtada ah; waxeyna u arki jireen dad u addoomoobay dhulka; reer guuraanimaduna in ay tahay xorriyad aan xad lahayn; wax badan ayaana is-afgaran waa ka dhex dhici jiray, sidaa daraaddeed ayaa si aad ah looga cabsi qabay in ay dheeraato muddada ay qaadanayso dejinta iyo dhaqan geddinta dadka la soo raray. Hase ahaatee xaqiiqadu waxay muujisay in aaney, arrintu sidaa ahayn, ee aaney dheeraan muddada ay qaadatay. Middaasina yaab ayey ku ridday dadkii tegay xarumaha dejinta iyo kuwii la socday xaaladda beelaha danwadaagta labadoodaba.

Waxaana ammaanta weyn leh siyaasada lagu maamulay arrimaha ku saabsan oo dhan dadkii cayroobay; sida loo taakuleeyay, loo hanuuniyay, caafimaadkooda loogu dadaalay; aqoontooda guud loo kordhiyay; casharro badan laga siiyay habka lala damacsan yahay in wax loogu qabto; iyo heerarkii kala duwanaa ee lala soo maray danayntooda badbaadintooda iyo dejintoodaba.

Waxaana wax weyn sii taray aqoonyahannada indheergaratada ah oo laga qayb geliyey soo raridda, daad guraynta iyo dejintooda dadkaa danwadaagaha la dejiyay; kuwaasoo ka qaatay qaybo qiimo leh oo dhaxal gal ah; dhinaca (kaalmayntooda) taageeriddooda, ama ka dhadhicintooda ujeeddada ka dambeysa dejintaas xeebaha iyo dhulalka beeraha; waxayna aad ugu fasireen nolosha cusub iyo horumarka banii-aadamnimada leh ee lala doonayo, umana suura gasheen taasi, haddii aaney la lahayn reer guuraaga xiriir is-afgarasho, waxaana ku sii kaalmeeyey tallaabadaa aqoontooda ku dhisan degaanka iyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo saameyn la'aanta nolosha dhaqannada shisheeye oo aan xoog ku yeelan.

Waxaana sii weheliya arrintaa iyagoo indheer garatadu u noqday walaalahooda Soomaaliyeed ee la soo hayaanshay, barayaal ka dhaadhiciya wax kasta oo ka dhiman; si ay ku gaaraan habka ugu sahlan oy danahooda ugu garan lahaayeen iyo dhaqanka cusub hase ahaatee ardayda shaqada qarankuna kaalintoodu waa lama illaawaan.

Waxaana sii kaalmeeyay dhaqangeddinta degdeg siimada

leh waxyaalo badan oy ka mid yihiin maamulka faraha loo geliyay oo la baray-xirfadaha lagu shaqeysto; tacliinta looga furay irridda iyaga iyo carruurtooda wanaagga laga tusay xagga beelaha la dejiyay iyo dheefaha ay kala kulmeen ama sida ay ula dhaceen dabeecadda iyo degaanka dhulka.

— Farqiga u dhexeeya noloshoodi hore ee xoola raacnimada iyo noloshan deggan.

— Dhibaatooyinkii raashin xumada, daawo la'aanta, tacliin la'aanta ka haystay.

— Hanuuninaha is-dabajoogga ahaa ee laga siiyey dejinta nooceeda, mustaqbalka sugaya, barnaamijyada la doonayo in loo hirgeliyo iwm. giddigoodna waxay soo dedejiyeen in ay ka xoroobaan, maskaxdoodana ka tiraan caadooyin badan oo meelihii laga soo raray lagaga dhaqmi jirey.

Waxaana ka mid ah hababka ay u degi jireen qabiil qabiil, reer reer iyo koox koox, hase ahaatee halkan waxaa la isla dejiyey kooxo iyo beelo ka kala yimid 8dii gobol ee abaaruhu ka dhaceen dadkii laga kala keenay; waxaana la isugu daray raashinkii, taladii, hawshii iwm., sidaa daraaddeed ayey is-barteen, wada noolaadeen, middaasina waxay dhalisay in meeshii shalay ay geel iyo xoolo yarad u kala qaadan jireen marka ay guursanayaan, in dhaqan cusubi ka dhashay halkaa oo ku saabsan meeshii la isa siin jirey gabdhaha iyo wiilka, ama la isu dooni jirey, in ay is doortaan maanta labada is rabtaa oo isla aqal galaan kharash la'aan.

Waxaana ka dhacay xarun ak mid ah beelaha danwadaagta dejinta, nin aan weligii ku riyoon aroos in uu beerka kaga dhaco inan la isla dhacay hawl yari, quruxdeedana laga yaabay.

Arrintaasina waxay ka mid noqotay waxyaalaha kaalmeeyey in ay cambaareeyaan caadooyinkoodii hore. Waxaana lagu tilmaami karaa isbeddelkaa dhaqan horumar bulsho gaartay, garaadkoodana saameeyey gaar ahaan dadka watay caadooyin kala duwan.

Sida la ogyahay bulshooyinka beeraleydu waxay leeyihiin dhaqammo ka geddisan xoolaleyda ama xeebo degayaasha iyo magaalooyinka, dhaqammadaasina waxay ku xiran yihiin xir-

fadaha lagu shaqeysto ama ku lug leeyihiin, caadooyin taariikha hore soo jiray.

Marka sheyga lagu tilmaami karo cusayb, oo la taaban karo waa dhaqammada ka abuurmay beelaha danwadaagta oo ka geddisan caadooyinka ay lahaayeen dadkii xoolaraacatada ahaa iyo beeraleydii lala soo degay, waxaana middaas lagu tilmaami karaa natiijo ka dhalatay laba nololood, ama kala geddisnaanta dhaqammada beelaha bulshooyinka ku kala nool meelaha kala duwan ee dalkan.

Tan kale waxaa lagu kala tilmaami karaa dhaqankii hore iyo kuwa cusub, mid ah duug iyo mid ku habeysan hab hantiwadaagnimo oo oggol wada noolaanshaha, wada dhaqanka iyo iskaashiga. Sababaha qanciyey dadkii la soo rarayna waxaa ka mid ah in ay arkeen in uu ka fiican yahay dhaqankan cusubi koodii hore, haddii kale dhibaatooyin ayaa lagala kulmi lahaa, waqti dheerna waa qaadan lahayd, sida hadda ka hor aan xusnay.

## FAA'IIDOOYINKA LAGA HELAY DEJINTA

Dalka J.D.S. wuxuu ka faa'iideystay ololihii raridda iyo dejinta libo aan la qiyaasi karin wax lagu qiimeeyana la arag, haddii loo eego dhinacyo badan oy ka mid yihiin :-

*1 — Maamulka*

Waxaa u caddaatay Soomaaliya oo ka faa'iideysatay dejintii in haddii la helo maamul wacan oo waddani ah, kuna shaqeeya isku duubnaan iyo wada jir in ay suura gal tahay in la qabsado wax kasta ama laga gudbi karo dhibaato kasta oo dalka soo food saarta, sida tan aynu ka hadlayno oo kale inkasta oy nala tahay in taasoo kale ay soo noq-noqoto qarnigiiba mar keliya.

Dhibaatada maamulka ayaana ka daran mid kasta oo kale, waxaana taas markhaanti u ah in aan sina looga gudbeen haddii aan la helin maamul hagaagsan, habaysan, oo hagar baxsan, haddana waxaa loo xil saarey maamulka beelaha danwadaagta guddi fuliya wax kasta oo ku saabsan danahooda oo uga hooseeya, Guddiga Sare ee Dejinta iyo Barwaaqaynta Beelaha Danwadaagta, waxaana si tifaftiran loogu sharxayaa arrintaa qaybta ka hadleysa maamulka.

Guddigaana maamulkiisu waa isku xiran yahay in kasta oo uu ka duwan yahay kan degmooyinka caadiga ah; talada fulinta; go'aannada iyo xilka hawlaha wada jir ayaana loo wada fuliyaa; shirarka la qaato ayaana lagu falaanqeeyaa mashaariicda degmooyinka Beelaha laga hirgelinayo, iyadoo laga dheeraanayo luggooyadii beroqraadiyadii waqtiga badani ku lumi jiray; iyo si deg deg wax looga qabto loona xalliyo dhibaato kasta oo la soo derista danwadaagaha maraya heer xasaasi ah oo miisaan saaran, ilaa ay tiirar mutaan oo miraha lagu hawllan yahay la gurto, sidaa ayaana culayska loo saarayaa; iyadoo kormeer joogta ah ay mas'uuliyiintu ku sameeyaan had iyo gooraale heerka hawluhu marayaan.

Waxaana xusid mudan in ay ka soo baxeen maamulka beelaha danwadaagta Kawaadir Cusub oo u bisil maamulka bulshada; yeeshay astaano is-maqal, is-maamuus, biseyl siyaasadeed, garasho danaha guud, kana helay waaya-aragnimo qiimo

leh, waana ka mid taasi faa'iidooyinka weyn oo laga helay, beelaha danwadaagta ee la dejiyay.

*2 — Xilkasnimo*

Waxay ku soo baxday xilkasnimada qofka Soomaaliyeed hawlaha gaarka ah ee lagu maamulo beelaha danwadaagaha, taasoo lagu maamulo hab ka geddisan, kan lagu maamulo hantida dawladda, waayo ma aha maamulkoodu mid caadi ah, sidaa daraaddeed waxaa dhici lahaa in ay tuugo badani ka dhici lahayd, maadaama meeshaa lagu maamulayo raashin iyo lacag, oo qofka isaga ahi ay dhici karto in uu u baahan yahay, haddana waxaad arkeysaa in taas laga nabad gelayo, taasna waxaa ina geyeysiiyay in la gaaray heer bisayl iyo jajabnaan loo jajaban yahay dhawridda hantida ummadda; iyo xilkasnimo dheeraad ah oo soo bannaan baxday markii dhibaato dalka soo food saartay; waxayna beddeshay fikraddii hore ee dalka ka hirgashay, taasoo ahayd «Maal gaalo oo la xado» oo isticmaarkii laga dhaxlay, lamana dhaqaalayn jirin hantida dawladda waqtiyadii gumeysiga iyo kaddib, hase ahaatee taasi waa beddelantay hadda; waayo waxaa loo gudbay marxalad ah in ay dadka ku abuurantay in lexejeclo loo yeesho hantida dawladda (Ummadda), waana looga faa'iideysan karaa middaas maamulka guud ee dawladda ee caadiga ah.

*3 — Garaadka iyo aqoonta*

Dadka la dejiyay waxaa aad u sarreeya garaadkooda siyaasadeed, loomana maleeyo in ay yihiin dad ka soo galay miyi maxaa yeelay, garashadooda guud ee ku saabsan nolosha adduunweynaha aad bay ugu kala soocan tahay, waana la socdaan adduunka axwaalahiisa, dhibihiisa iyo khayrkiisaba, in kasta oy kooban tahay dugsi geliddoodu, misana waxba kama duwana indhafurraantoodu mid kasta oo ilbax ah ama dugsiyo aqoon kororsi galay.

Waxayna ka heleen dabeecadda casharro waaya-aragnimo, amase nolosha dabeecadda ayaa macallin u ah iyaga, sida ay u arkayaan arrimaha ku lug leh mustaqbalkooda; walaacii ka hayey noloshoodii hore iyo sida ay ugu han weyn yihiin in ay ka baxaan dhibaatadii wax badan soo haysatay taasoo ay ku

muujiyaan shirarka iyo fikradaha heerka sare ah oo ay cabbirayaan giddigood waxay noqdeen wax ku ool, la tixgelin karo, kana beddeshay dad badan fikraddii laga haystay reer miyiga Soomaaliyeed; in ay garaad gaaban yihiin; waxaa beddeshay in ay yihiin dad qab weyn, fiiro dheer, daacad ah, warcad, deeqsiyaal ah, daneeya danaha guud, jecel wada tashiga iyo wax wada qabsiga u indha furan siyaasadda, sidaa daraaddeed laguma tilmaami karo, ama lagama qaadan karo fikradaha laga haysto dadyowga ku nool dhaqannada xoola raacimada, taasoo ay caddeysay waaya-aragnimada laga helay abaarihii ka dhacay Soomaaliya 1974kii - 1975kii.

Dhinaca waxbarashadaa waxaa yaab noqday in ay muujiyeen maskax furan, waxbarasho u debecsanaan, dabeecad wanaag; maskax u diyaar ah waxbarasho, taasoo marrayd waqtigaa ka hor, waxayna aad uga soo dhalaaleen tababarradii xirfooyinka oo la siiyey muddadii la qaayibinayey dhulkaa cusub, maantana ma deggana Beelaha Danwadaagta qof aan wax qori karin, heer kasta ha gaarsiisnaadee, dugsiyada ka dhisan ardayda dhigatana waxay u dhigmaan xagga tirada kuwa dhigta 6 gobol oo aan Xamar ku jirin, taasina waxay caddeeyneysaa niyadda ay u hayaan waxbarashada iyo mustaqbalka wacan oo ka abuurmaya halkaa, iyadoo la filayo in ay noqoto meel dhalisa dad Soomaaliyeed oo wax weyn u tara dalka marka ay wax bartaan, haddii kalese waxba iskama beddelayaan noloshoodii reer guuraaga ahayd ee laga soo raray.

*4 — Dhaqan*

Waxaa lagama maarmaan noqday in la dhaqangeddiyo dadka reer guuraaga xoola dhaqatada ahaa; lana garansiiyo farqiga u dhexeeya noloshoodii adkayd iyo tan loo doorayo; si ay u beddelaan dhaqankii hore oo dugsanaya, qallafsanaanta; jahliga, mustaqbal xumada ama nolol xumada, xoola raacnimada ka reebtay asaagood; waxaana la hubsaday fiiro badan kaddib markii loo yeeshay in aaney suuragal noqonayn in wax iska beddelaan noloshoodii hore; haddii aan la dhaqan guurin, oo dhul cusub la geyn dadkaa, sidaa ayeyna taladu ku dhammaatay oo lagu dhaqaaqay waqtigii la gooyey.

## 5 — *Dhaqaalaha*

Waxaa la arkay in aan la fiirsan karin Ummadda Soomaaliyeed tiradii ugu badnayd oo ku nool miyi, oo aan kaalintii laga filayey oo u qalantay ka qaadanayn dhismaha, iyo horumarinta dhaqaalaha waddan kacaan ah oo u baahan inuu ka faa'iideysto cudud kasta oo awoodda hawl qabasho, haba ugu yaraatee dhagax-qaadid; haddii aan la helin taasna waxaa adkaaneysa in la xaqiijiyo wax badan oo la higsanayo in la gaarsiiyo dalkan iyo dadkiisa muddo gaaban. Sidaas daraaddeed ayaa loogu baahday in ay dadweynuhu si buuxda uga qayb qaataan dhismaha dhaqaalaha waddanka yeelkadeede dhibaatada ugu weyni waxey ka timid xagga kala duwid la'aanta IBAHA DHAQAALAHA IYO XOOJINTA TIIRARKIISA maxaa yeelay waqtigan ka hor lagama fekerin, lagumana dhaqaaqin wax tallaabo ah oo waxtari kara, inkasta oy soomaaliya leedahay laba Webi dhul dihin oo wax kasta laga beeran karo (8 Malyan Hegtar), bad dhererkeedu gaarayo (3,330 Mayl Badeed) oo aan si quman looga faa-iideysan; Xoolo fara badan oo aan si casri ah loo manaafacaadsan,ama dadka ku taxan oo ka badan intii loo baahnaa in ay ka hawl galaan maxaa yeelay tirada dadka ku nool Xoola dhaqashadu uma dhigmaan inta kaga soo aadda dalka qeyb ahaan, haddii la isu kala qeybsho qeybaha tiirarka dhaqaaluhu u baahan yahay wax qabasho sidaa daraaddeed ayey meelna ugu bateen meel kalena ugu yaraadeen. dhibaatada runta ahina waxay soo gaareysaa waa dadka iyo dalkaa, waqti dhow iyo mid dheerba.

Waxaana lagu xisaabiyaa xirfo ahaan marka saacadaha wax la qabto la tilmaamo dadka xoola raacatada ah, in ay yihiin HOWL LAAWAYAAL oo kale waqti badanna bilaash ku lumiyaan iyagoo aanu waqtigu qiimo ugu fadhiyin, waxaa intaa ka sii daran oo dul saar ku ah qoys kasta oo reer miyi ah tiro ka badan intaa ku habboonaan laheyd. taasina waxay dhalisay in marar badan qaarkood u soo yacaan nidaam darro magaalooyinka, iyagoo aan wax xirfad ah aqoon oo markaa ay ku noqdaan dulsaar aad garaneyso in ay culeys ku yihiin bulshada, in kasta oo miyigu u yahay magaalooyinka kayd laga helo xoog shaqaale mar kasta oo loo baahdo. waxayna u ba-

dan tahay in ay leedahay taasi khasaarooyin iyo faa-iidooyin isku dheehan.

Waxyaabaha dhaliyey in la sameeyo mashruuca beeraha (CRASH PROGAMME) waxaa ka mid ah in la baro dhallinyarada miyiga ka timid, xirfadda beera falashada, si ay u buuxiyaan kaalintii marreyd oo ku tilmaaneyd in ay kala soo baxaan dhulka kheyraadka ka buuxa, arintaasina waxay noqotay mid lagu guuleystay, maantadatan ayaana la arkay faa-iidadeedii halkaasoo ay kaalin wacan ka qaateen dhallinyarda mashruucu waxbaridda dadkii la dejiyay.

Dhinaca kale haddii laga eego saldhig waxaa u ah dadka la dejiyay beeraha iyo xeebaha sababo dhaqaale iyo waxyow kale oo aan xusidoonno, giddigoodna waxay kaalin wanaagsan ka qaadanayaan mustaqbalka fog, horumarinta dhismaha dhaqaalaha dal hantiwadaag ah oo u halgamaya in uu si deg-deg ah horumar u gaaro; si uu uga baxo dambeynta, ama dib u dhaca.


Tan kale dejintu waxey u tahay dadka la soo raray fursad aan wax lagu qiimeeyo la arag, maxaa yeelay in kasta oy ka raysanayaan kadeed miyi, misana lafahooda ayaa ku dhismaya.

Waxaana JDS fursad weyn u noqday sida aan hadda ka hor tilmaannay, in ay ka faa'iideysato abaartii heshay dalkeead oo wax ka qabato arrin ku adkaan lahayd haddii aan abaari dhici lahayn, waayo reer guuraagu ma oggolaadeen in laga raro dalka ay degaan, waana diidi lahaayeen haddii aan dani oran; taasina waxay u ahayd xukuumadda guul aan la arag iyada oo kale ilaa waqtigan.

Dhinac wax u qabasho dad; haddii laga eego ama wax tarka ay u leedahay ummad ahaan; mustaqbalka dhow iyo kan dheerba.

Waxeyna kaga heshay adduunka oo dhan ammaan ballaaran iyo maamus aan la koobi karin. Waxeyna taabsiisay Ummadda Soomaaliyeed sida ay ugu hagar baxday Xukuumadda Kacaanku iyadoo danaynaysa dadkii ay dhibaha abaartu soo gaareen, ama heeganka ugu tahay, marka dani tiraahdo oo loo baahdo waxqabasho ama dhibaato la soo gudboonaato.

Sida la ogyahay ma dhicin in ay Xukuumadda Kacaanku u garab banneyso; ama cidla uga tagto dadkeedii; waqtigii xumaa oo soo maray; sidii hadda ka hor dhici jirtay waayadii hore; waayo dadka dhiboobaa waxay la kulmi jireen daneyn la'aan, dayac darro, markaa ayey u laban laabmi jireen dhibaha ka dhashaa halkaa.



*Dadkii la dejiyey oo wax la barayo*

*6 — Waxbarid*

Reer miyigu ma helin cid wax barta Kacaanka ka hor, mana aqoon wax la yiraahdo waxbarasho casri ah oo jahliga lagaga baxo; iyo cid daneynaysa toona danahooda; hase ahaatee si looga saaro taas oo loogala dagaallamo jahliga ayey uga mid ahayd ujeeddada weyn ee looga soo raray dhulkoodii hore, loona dejiyey dhulka laga dhigay beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada; si wax loo baro; si ay uga baxaan dhibaha iyo kadeedka jahliga; taasina waxay dhalineysaa in ay lafahooda wax taraan, markaana kaalin fiican ka qaataan wax-u-qabashada dalka; waayo waa la og yahay in aannu waxba ahayn qof aan wax-aqooni; waxna ma qabsan karo, dani-

hiisa, ma garan karo, cid kalena ha sheegin, dal iyo dadna midna tirada uguma jiraan.

Run ahaantiina middaas ayaa heshay, waayo waxay garan waayeen dhibaatada heshay heerka ay gaarsiisan tahay; waxay dabada ku wadato, sidii ay uga gaashaaman lahaayeen, siday ugu timid iyo meesha ay ka timid, ilaa ay baabi'isay Abaartii mood iyo noolba waxey haysteen oo la dul timid culays xun.


Hase ahaatee hadda ayey heleen fursaddii waxbarashada kaddib markii loo fududeeyey awood kasta oo wax lagu barto iyaga iyo carruurtooda, kumana eka waxaa la baraa higaad keliya ee waxaa weheliya farsamooyin badan oo kala duwan oo meel kale kaga qoran buuggan; waxaadna maanta kala kulmeysaa Beelaha Danwadaagta tiro aad u badan oo wax bartay isla markaana u beddelmaya in ay noqdaan barayaal, waxbara beeraleyda iyo kalluumeysatada,, si ay ugu suura gasho in lagu fidiyo aqoonta dhexdooda, yeelkadeede ardayda maanta wax ku barta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatadu waxay ku dhow yihiin kuwa Xamar Dugsiyadeeda subaxdii ku kallaha, iyadoo ay yihiin carruurtu ugu yaraan 60% dadka ku jira Danwadaagta. Tacliinta loogu dadaalayaana waxay muujineysaa sida xoogga leh ee loo danaynayo in lagala dagaallamo dadweynaha cadowga jahliga sida ku cad Ballanqaadkii Kacaanka ee Xaashida Koowaad 21kii Oktoobar 1969kii.

7 — *Garaad Ummadnimo*

Waxaa ka dhashay dadkii la isugu geeyey xarumaha kooban garasho ummadnimo halkaasoo ay isku barteen dadkii laga kala keenay gobollo kala duwan, taasoo dhalisay is-dhexgal, is-afgarad, iskaashi, is-wareysi, walaaltinnimo. is-garabsi, ama is-garabsi uu keenay isku dan ahaanta, isu garaw aadaninimo iyo u garaw Dawladda Xukuumadda Kacaanka Soomaaliyeed, waxyaabaha ay u qabatay ummaddeeda dhibaatadu heshay, waxayna arkeena dadkaasi wax badan oo ka daahnaa waqtigaa ka hor taasoo aan ku tilmaamayno garaadkooda oo kor u kacay; kuwaasoo gaaraya heer ay isku hanuuniyaan wax kasta oo ku lug leh danta guud.



*Jaalle Siyaad oo sahan ku tegey meelaha dadka la dejiyay inta aan la soo rarin ka hor*



*Koox ka mid ah dadkii la dejiyey oo waqtigaa dayuurad lagu geeyey*



*Jaalle Siyaad iyo Neyreere oo lagu soo dhaweeyey Beelaha Dejinta*



*Jaalle Siyaad oo Sablaale booqasho ku tegay*

*Qorshaha loogu talo galay mashaariicda laga hirgelinayo Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada*

Waxaan xusnay hadda ka hor in fikradda dadka la dejiyey dhulalka Xeebaha iyo Beeraha ah ay tahay mid salka ku haysa siyaasad wax badan la doonayey in la hirgeliyo, misana waxay noqotay mid ku hirgashay waqti kedis ah taasoo ka dhalatay abaartii xumayd oo dad badan oo Soomaaliyeed si xun u cayreysey, dantuna tiri in la daryeelo, kaddibna la dejiyo, meelo kaga habboon miyigii ay markii hore ku noolaayeen, middaasina waxay dhalisay in la qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagama maarmaan noqday.

Kedisna waxaa loola jeedaa iyadoo ay dejinta dadkaasi ahayd mid aan loo sameyn qorsheyn ka horreysay, sida adduunweynuhu u bartay in la raaco, ee waxay ahayd mid hawl badan loogu qabtay waqti yar. Ujeeddooyinkii looga dan lahaana suuragelisay; oo guul laga gaaray.

Bilaw wanaagsan, hase ahaatee markii ay dhammaatay hawshii raridda iyo dejintu waxaa la isku dayey in loo sameeyo dadka la dejiyey beelaha danwadaagta qorshe wax loogu qabto, ama loogu hirgeliyo wax badan oo lagama maarmaan ah si looga sameeyo xarumaha cusub ee kor ku xusan.

Sidaa daraaddeed ayaa looga bilaabay hawsha meeshii ugu habbooneyd iyadoo loo kala hormariyey sidii loogu kala baahi badnaa, ama wixii awoodda dalka ku xirraa iyo wixii aan waqti dheer sugeyn, iyaguna ay u baahan yihiin, isla mar ahaantaana ay suuragal tahay inay gacan ka geystaan fulinteeda sida beera sameynta oo kale, ama dhul diyaarinta iyo hagaajintiisaba.

Qorshahana waxaa loo qaybiyey dhawr nooc isagoo leh dhawr weji, sanooyin kala horreeyana lagu fulinaayo; taasoo la socota kala duwanaanshaha meelaha dadka la dejiyey (Xeebo iyo Beero).

Mashaariicduna waxay kala tahay kuwo ku saabsan beero falid, ballaarinta dhulka, kala duwidda abuurka, farsamooyinka la barayo dadka la dejiyey dhulalka xeebaha-beeraha, doonyo u sameyn, warshado lagu sameeyo kalluunka laga soo saaro badaha sidii looga sameyn lahaa meelaha beelaha danwadaagta xeebaha oo dhan, taasina waxay dhalisay in laga hirge-

liyey Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada mashaariic horumarin oo kala ah kuwo ay toos JDS u fulineyso iyo kuwo ay la kaashaneyso hay'ado dawli ah iyo dalal saaxiib ah.

Waxaana u suura geleysa beelaha danwadaagta marka laga hirgeliyo mashaariicda loo qorsheeyey in ay gaaraan heer ay isku fillaadaan oo wax badan oo looga baahdo kabaan.

Beelaha la sameeyeyna ma noqon doonaan kuwii ugu dambeeya oo dad Soomaaliyeed la dejiyo, meelahaas oo kale ee waxay noqoneysaa bilaw wanaagsan oo gundhig u ah hawl wax badan socon doonta; kuna habeysan siyaasad dawladeed iyo straateejiyad guud oo wax lagaga qabanayo dhibaatooyin soo haystay dadka Soomaaliyeed oo ku nool miyiga kuwaasoo badankood ah xoola-dhaqato reer guuraa ah; oo kadeed ku noola.

Waxaana lagu socon doonaa wixii ka dambeeya hadda qorshe cad oo habeysan, oo leh meel uu ka bilawdo iyo meel uu ku dhammaado; iyadoo loogu talo gelayo wax kasta oy dejintaasi u baahan tahay, iyadoo laga faa'iideysanayo waayaaragnimadii laga helay abaartii dhacday 1974kii iyo dadkii la dejiyey 1975kii.

Beelaha danwadaagta beeraleyda iyo kalluumeysatada dadka ku tababartaana waxay u noqon doonaan aqoonyahanno barayaal ah dadka la dejin doono mustaqbalka sida ay u yihiin hadda dadkii lagu tababaray mashaariicda beeraha degdegga ah (Crash Programme) barayaal beereed dadkii la dejiyey dhulalka beeraha ah.

Aad ayaana loogu rajo weyn yahay in ay noqdaan wax kasta oo laga qabanayo Beelaha Danwadaagta kuwo la baaray oo laga baaraan degay si aan loogu dhicin gefaf laga digtoonaan karo.

Qorshaha loo sameynayo Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada iyo mashaariicda laga hirgelinaayoba waxaa loo qaybiyey laba nooc oo kala ah :--

b. Qorshaha Beelaha Danwadaagta Beeraleyda;
t. Qorshaha Beelaha Danwadaagta Xeebaha.

Sidaa ayaana loo kala hor marinayaa marka laga hadlayo mid walba.

## BARNAAMIJKA DEJINTA BEELAHA DANWADAAGTA BEERAHA

*Kharajka Dawladdu ku bixisay Beelaha Dejinta Beeraleyda 1975kii*

Dadka la dejiyey dhulka beeraha ah kharajka lagu bixiyey 1975kii ilaa bisha Disember isla sannadkaa; wuxuu gaarayaa Sh. So. 67.576.741.49. Haddii lagu daro kharajka 3dii bilood ee hore 1976ka waxaa lagu qiyaasay 12.217.261, markaa tirada guud waxay noqoneysaa Sh. So. 79.794.002.94.

Waxayna kala yihiin wasaaradaha kala bashay kuwan :-

| | | |
|---|---|---|
| ONAT (Wasaaradda Beeraha) | Sh. So. | 5.286.000 |
| Wasaaradda Gaadiidka | » | 1.027.110 |
| Wakaaladda Biyaha | » | 6.864.504 |
| Wakaaladda Dejinta Danwadaagta | » | 11.664.417.40 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud | » | 1.000.000 |
| Wakaaladda Xoogga Korontada | » | 4.690.504 |
| Wasaaradda Warfaafinta | » | 100.000 |
| Wasaaradda Waxbarashada | » | 1.000.000 |
| Wasaaradda Caafimaadka | » | 4.040.000 |
| Wasaaradda X. Xoolaha | » | 300.000 |
| Xafiisyada Gobollada iyo Deg. | » | 23.292.132.92 |
| Kharashka Xarumaha Nasashada | » | 1.312.072.97 |
| Gaashaandhigga | » | 7.000.000 |
| | *Sh. So* | *67.576.741.94* |

Waxaana lagu qiyaasay kharajka lagu bixinayo mashaariicda laga hirgelinayo Beelaha Danwadaagta Beeraleyda sannadka 1976ka lacag dhan Sh. So. 138.2 malyan.

Waxaana la filayaa in uu yaraado kharajka ay bixiyaan wasaaraduhu kaddib markii ay si wacan u toostay arrinta dejintu, inkasta oo loo baahnaan doono hawlaha wasaaradaha qaarkood gaar ahaan, beeraha iyo xoolaha kuwaasoo aan lagu qiyaasi karin hawshoodu waqtiga ay ku ekaan doonto.

*Maalgelinta horumarinta Beelaha iyo meelaha laga fidayo*

Waxaan ku xuseynaa halkan lacagtii lagu qiyaasay in horumarin loogu sameyn karo Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo meelaha la filayo in ay ka yimaadaan, waana sidan :-

| | | |
|---|---|---|
| — Maalgelin dibadeed oo gaareysa | Sh. So. | 940.476.000 (Cunto kuma jirto) |
| — Ballanqaad iyo siin ka imaneysa EEC iyo African Development Bank | » | 206.000.000 |
| — Deyn | » | 175.000.000 Arab Fund/IBRD |
| — Maalgelin guud ahaaneed oo ka imaneysa Miisaaniyadda Dawladda | » | 164.253.000 |
| — Raashin | » | 505.830.000 |
| — Kaalmo laga filayo W.F.P. 3½ sano ee soo socda | » | 294.000.000 |
| — Miisaaniyad raashin aan la daboolin | » | 211.830.000 |

Waxaa iyana jira meelo kale oo laga filayo ballanqaad kaddib kaalmo dibadeed oo ka baxsan kharajkii aan kor ku soo sheegnay oo gaareysa lacag dhan Sh. So. 65.450.000.


Waxaana lagu qiyaasay maalgelinta horumarinta tabarta loo baahan yahay in wax loogu qabto 3da beelood ee Danwadaagta Beeraleyda kaddib markii aad looga shaqeeyey inta ay ku kacayaan mashaariicda laga hirgelinayo halkaa qiyaasta qiimahooda hore iyadoo ku timid baarid iyo lafagur lacag dhan Sh. So. 1.340.478.000, iyadoo kala ah :-

| | | |
|---|---|---|
| Kurtuna Waarey | Sh. So. | 404.762.000 |
| Sablaale | » | 200.873.000 |
| Dejuuma | » | 734.843.000 |

Qiyaas ahaan haddii aan u soo qaadanno, dhulalka laga beeray 3 beelood ee beeraleyda iyo dadka ku shaqeeya waraabka webiga, iyo kuwa roobka, miraha ku soo baxay roob-

ka, shaqada waqtiga dheeraadka ah la qabto, farsamo yaqaannada, aqoonyahannada, kuwa tababarka ku jira, inta hegtaar dhulka la banneeyey, xoogga banneeyey, shaqaalaha waddooyinka dhisa, ama xoolaha xannaaneeya.

Inta la heli karo oo waqti dhan shaqayn kara, iyo tirada guud ee dadka ku nool Beelaha Danwadaagta Beeraleyda, waxaa caddaanaysa in ay ku jiraan tiro aad u badan oo aan dugsiyo dhigan, hase ahaatee aan gaarin sanooyin hawl loo dirsan karo, taasoo caddeynaysa in ay ku jiraan Beelaha Beeraleydu heer aaney wada dabooli karin hawl kasta oo looga baahdo, marka si wacan looga hirgeliyo halkaa mashaariicda loogu talo galay oo kala duwan una baahan dad badan oo shaqada ku xirma.



Waxaana loogu tala galay lacagta aan kor ku xusnay in loogu qorsheeyo sidii wax loogu qaban lahaa 56.000 hegtaar oo waraab ah iyo 10.000 hegtaar oo roob ah. Saddexda beelood ee danwadaagta, marxaladda hore waxaa loo habeeyey in la dhammeystiro 15.000 hegtaar waraab ah, iyo in u dhow 22.000 hegtaar roob ah.

Dhulka qaarkii oo gaaraya 7.000 hegtaar oo roob lagu beerayo waxaa lagu dhammeystiri doonaa foondada qaybaha wasaaradaha 1977ka marka uu bilawdo mashruuca Arab Fund-IBRD.

Barnaamijkuna waa sidan :-

| Bilawg heerka hore (Phase 1) | K. Waarey W.-Roob — 2,500 | | Sablaale WW-WR — 2,500 | | Dujuma WW-WR — 2.000 | | Wadar Guud WW iyo Roob — 7,000 | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Dhammaad Heerka 1aad | 3,000 | 5,500 | 3,000 | 55,000 | 9,000 | 11,000 | 15,000 | 22,000 |
| Dhammaad Heerka 2aad (Phase 2) | 18,000 | — | 8,000 | 10,000 | 30,000 | — | 56,000 | 10,000 |
| Dhulka la doonayo in la dhammeystiro heerka 2aad | 15,000 | — | 5,000 | 9,500 | 21,000 | — | 41,000 | 9,500 |

Maalgelinta loogu baahan yahay fulinta Qorshaha Hawlaha Beeraha oo dhan. (000's So. Shs).

| Dhir qaadid Dhul sinid | K. Waarey | Sablaale | Dujuuma | Isugeyn |
|---|---|---|---|---|
| Rakibid Qalab-ka Beeraha | 316,029 | 171,847 | 425,994 | 913,870 |
| Maalka lagu shaqaynayo | 34,640 | 26,600 | 48,891 | 110,059 |
| Cuntada loo baahan yahay | 54,093 | 2,426 | 260,030 | 316,549 |
| Wadar Maalgelin | 404,762 | 200,873 | 734,843 | 1,340,478 |
| Ku darid Raashin loo baahday oo la baddal y | 110,107 | 79,173 | — | 189,281 |
| Wadar Maalgelin | 514,869 | 280,047 | 734,843 | 1,529,759 |

*N.B. — waxaan ka hellay tirooyinka Xafiiska Staatistikada Xubinta Teknikada.*

Tirooyinka kor ku xusan waxaa lagu qaddaray (Estimated) saldhigga xoolaha wax lagaga qabanayo. iyo maalgelinta cududda (Working Capital) ee dhulka saddexda beelood ee beeraha loogu talo galay. iyadoo Sablaale laga sameynayo 8000 hegtaar oo waraab ah keliya

*Dhulka la horumarinayo iyo qiyaasta waxa ka soo baxa wixii ka soo noqonaya*

Qorshaha ugu dambeeya ee lagu horumarinayo 3 beelood ee beeraleyda ah oo la deggan yahay wuxuu noqonayaa in loo habeeyo Degmada Kurtun Waarey giddigeed waraab iyada iyo Degmada Dujuuma labadooda dhulba, iyo ugu yaraan in laga hagaajiyo Sablaale 8000 hegtaar.

Waxaana la soo jeediyey ujeeddo qorshe darteed in ay heerka koowaad ee (Phase 1) laga hirgeliyo mashaariicda hagaajinta iyo simidda dhulka, keliyo waraab qodiddooda, taasoo ka mid ah heshiiskii lala galay IBRD-ARAB FUND.

Waxaana halkan ku cad dhulka 3 beelood loogu talo galay Beerashada Heerka Koowaad 1975-1978ka iyo Heerka 2aad 1978-1983ka. Waraab iyo roobba.

| Dhulka oo dhan | Kur. Waa. | Sablaale | Dejuuma | Isugeyn |
|---|---|---|---|---|
| | Heg. | Heg. | Heg. | Heg. |
| Carro waraab webi | 18.000 | 8.000 | 30.000 | 56.000 |
| Carro waraab roob | — | 10.000 | — | 10.000 |
| Phase 1 (By 1980) | | | | |
| Carro waraab webi | 3.000 | 3.000 | 9.000 | 15.000 |
| Carro waraab roob | 3.000 | 3000 | 9.000 | 15.000 |

Waxa ka soo baxaya wixii ka soo noqonaya oo la gado :-

(Sh. So. 000's)

| | Kur. Waarey | Sablaale | Dejuuma | Isugeyn |
|---|---|---|---|---|
| 1976 | 1.000 | 900 | 700 | 2.600 |
| 1977 | 1.600 | 1.400 | 1.200 | 4.200 |
| 1978 | 2.700 | 2.400 | 2.600 | 7.700 |
| 1979 | 4.100 | 3.700 | 5.400 | 12.200 |
| 1980 | 4.600 | 4.100 | 7.600 | 15.300 |
| *Wadar Guud* | *14.000* | *12.500* | *17.500* | *14.000* |

*(Phase 1)*

Xisaabta halkan ku qoran waxaa qiyaasta lagu daray xilliyada Guga iyo Dayrta marka roobka da'o.

*Barnaamijka Shaqada ee Beelaha Danwadaagta Dejuuma Kurtun Waarey iyo Sablaale*

*1976 Abriile — Juun*

Hawsha la qabanayaa 3da bilood dhexdooda waxay ka koobnaan doontaa :-

1. Waxaa la bandhigayaa qandaraas lagu bixinayo dhismo biyo xireen ee Sakow ee laga samaynayo keliyo waraab oo loo jeexayo beeraha Danwadaagta.

2. Waxaa la diyaarinayaa qorshe lagu bixinayo qandaraaska sameynta keliyada waraabka ee Degmooyinka Sablaale Kurtun Waarey.

3. Waxaa la bilaabayaa tobograafiyada dhulka ee Dejuuma, Sablaale iyo Kurtun Waarey.

4. Waxaa la dooranayaa oo la soo saaraya qandaraasyadii hadda ka hor la baxshay kuna saabsanaa habaynta iyo hagaajinta dhulka iyo qalabka beeraha lagaga shaqeeyo.

5. Waxaa laga bilaabayaa saddexda danwadaagood dhulal yar yar oo tijaabo lagu sameynayo ee dhulka waraabka webiga ah, lagana beerayo bariis, cudbi, laws, (Dejuuma) iyo qamadi laga beerayo Sablaale iyo Kurtun Waarey.

6. Waxaana la sii wadaya bannaynta dhulka iyo faliddiisa iyo hawlo kasta oo ku lug leh ka faa'iideysiga dhulka iyo hirgelinta barnaamijka qorshaha loogu talo galay in laga fuliyo halkaa.

Dhinaca kale haddii laga eego barnaamijka, isla bilaha la tilmaamay loogu talo galay oo ka duwan midka aan kor ku xus nay; waa sida soo socota :

1. Qorshaha hawsha lagu qabanayo; waxaa la simayaa : la dhir qaadayaa, la carra geddinayaa, oo la falayaa dhulka loogu tala galayo beeridda iyadoo laga kala fulinayo 3 Danwadaagood.

DUJUUMA : Muddo 3 bilood ah waxaa laga sameyna-

yaa halkaa 500 hegt. oo roob lagu beerayo 200 hegt. oo biyaha webiga lagu waraabinaayo.

ABUURID : Waqtiga guga ah waxaa la abuurayaa 2000 hegtaar oo roob lagu beerayo, iyadoo u kala qaybsan :

Haruur 500 hegtaar oo roob lagu beero.

Gelley 1000 hegtaar oo roob lagu beero.

Khudaar 500 hegtaar oo roob lagu beero iyo waraab labada nidaamba.

Sablaale : Abriile — Maajo — Juunyo, waxaa laga beerayaa dhul dhan 250 hegtaar oo roob lagu abuurayo.

100 hegtaar oo waraab lagu abuurayo.

Abuurid : Waqtiga Guga waxaa la beerayaa 2500 hegtaar oo roob lagu beerayo waxayna kala yihiin :-

Haruur 100 hegtaar oo roob lagu beerayo.

Galley 1000 hegtaar oo roob lagu beerayo.

Kurtun Waarey : Waxaa halkaa laga beerayaa dhul dhan 250 hegtaar oo roob lagu abuurayo.

Abuurid : Waqtiga guga ah waxaa lagu tallaabsaday in la qabto hawl ah, beerid, masaggo 250 oo hegtaar oo roob lagu beero, beerid galley 1000 hegtaar oo roob lagu beero, digir iyo khudaar 500 hegtaar oo roob iyo waraab webi la isugu daro beeriddooda.

Waxaa kale oo lagu talo jiraa in la beero muddada dhexdeeda oo kale :

600 — 900 hegtaar iyadoo kala ah :

Dujuuma 200 — 300 hegtaar.

Sablaale 200 — 300 hegtaar.

K. Waarey 200 — 300 hegtaar.

Tuubooyinka waraabka ugu yaraan waxaa la geynayey halkaa 26 dhuumood, bishii Maajo dhexdeeda ee 1976ka,

waxaana lagu rakibayaa mid walba oo ka mid ah beeraha beel walba tuubooyinka biyaha ka soo saara webiga ama sii gaarsiiya meelaha loo rabo.

*Barnaamijka Tababarka :*

Waxaa la bilaabayaa barnaamij tababar wadayaal iyo doorasho nooca (Model) tababarsiin beer falashada, xannaanaynta digaagga, cagaf cagaf wadidda, la dagaallanka cayayaanka.

*Waraabinta*

Waxaa la dhammaystiray waqtigii Guga ka hor hawlihii qodidda keliyada iyo simidda dhulka la beeranayo si loogu beero khudaar iyo digir (fajolli).

*1976ka Luulyo — Setember*

Saddexdaa bilood ee kor ku xusan qorshaha hawsha la qabanayaa waxay noqotay sidatan:

1. Waxaa la bilaabay habayntii habkii hawsha loo qaban lahaa, buuntada Sakow, iyo keliyo waraab faracyo ah ee Sablaale iyo Kurtun Waarey.

2. Waxaa la bilaabayaa qorshihii hawsha waraabinta saddexda beelood ee Danwadaagta Beeraleyda.

3. Waxaa la sii wadayaa indha indhayntii tobogaraafiyada ee dhulka la beerayo.

4. Waxaa la sii wadayaa tijaabadii miraha la beerayo.

Isla muddada saddexda bilood ah waxaa laga diyaariyey Dejuuma 500 hegtaar oo roob lagu beero.

200 hegtaar oo webi lagu waraabsho.
Deyrta : Waxaa la abuuray 2700 hegtaar oo kala ah :
Masaggo; 1000 hagtaar oo roob lagu beero.
Galley, 1000 hegtaar oo roob lagu beero
Khudaar iyo digir 700 hegtaar oo waraab ah.

*Sablaale*

250 hegtaar waraab roob.

200 hegtaar waraab webi.
Abuur dayreed 2300 hegtaar.

*Kurtun Waarey*

250 hegtaar abuur roob.
200 hegtaar waraab webi.
320 hegtaar roob.
Galley 1500 hegtaar roob.
Masaggo 1000 hegtaar roob.

Khudaar iyo digir 700 hegtaar roob iyo waraab webi.

Roobka dayrta ka hor waxaa la diyaariyey, keliyo, dhul-simid iwm. Barnaamijka Luulyo — Sebtembar 1976ka waxaa kale oo weheliya, hagaajin beero laga sameeyo meelaha soo socda:

Dujuuma 500 hegaatr.
Sablaale 500 hegtaar.
K. Waarey 500 hegtaar.

*Dhuumooyinka Biyaha*

In ka badan 26ka dhuumooyinka biyaha lagula soo baxo ayaa mid walba lagu rakibay maalinta 12ka ka hor bisha Sebtembar 1976ka, si ay hawshu isugu dubba dhacdo.

*Aqoon yahanno*

Isla waqtigaa waxaa imanaya Beelaha Danwadaagta Beeraleyda aqoonayahanno ku xeel dheer cilmiyada beeraha dhinacyada :-

— Maamulka beerta.
— La dagaallanka cayayaanka.
— Mekaanikada injineernimada.
— Dhaqaalaha beeraha iwm.

*Tusaale fiiri Dejuuma*

| DUJUUMA | XILLIGA DAYRTA 1976ka | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | *1976* | *1977* | *1978* | *1979* | *1980* | *1981* |
| Dhulka waraabka ah Hegt | 500 | 1,500 | 3,000 | 1,500 | 1,000 | 9,000 |
| Tirada Shaqaalah Waraabka. | 15,00 | 4,500 | 9,000 | 13,000 | 15,000 | 16,000 |
| Dhulka roobka lagu waraabsho. | 15,00 | 3,000 | 5,000 | 7,000 | 9,000 | 9,000 |
| Tirada Shaqaalah dhulka roobka lagu waraabsho | 15,000 | 3,000 | 5,000 | 7,000 | 85,000 | 8,000 |
| Shaqada xilliga dheeraadka tirada hegt. | 3,000 | 4,000 | 6,000 | 9,000 | 12,000 | 13,000 |
| Dadka la tababaray | 180 | 180 | 180 | 180 | 180 | 180 |
| Dhuka la bannaynayo Hegt. | 3,500 | — | 3,500 | 4,000 | 4,000 | 2,000 |
| Xoogga bannaanaynaya dhulka | 6,000 | 6,000 | 6,000 | 6,000 | 1,000 | 500 |
| Farsamo yaqaan aqoon leh | 500 | 600 | 700 | 800 | 900 | 900 |
| Ka qaalaha Dhismaha Waddooyinka | 7,000 | 2,500 | 3,000 | 1,000 | 1,000 | 1,000 |
| Shaqaalaha heli kara waqti buuxa | 21,000 | 23,000 | 23,000 | 26,000 | 26,000 | 26,000 |
| Tirada dadka oo dhan | 50,000 | 50,000 | 50,000 | 50,000 | 60,000 | 60,000 |

## MURUQ MAAL

*(Utilization of Labour)*

Xagga shaqada la qabtaa waxay ku dhisan tahay dad-weynaha Danwadaagaha cududdooda laga faa'iideysto, tira-dooda iyo habka ay u shaqeeyaana waxay tahay sidan :

| *Magaca* | *Dadka* | *Waqtiga buuxa ee Shaqada* | *waqtiga dheeraadka ee Shaqada* |
|---|---|---|---|
| Sablaale | 29.000 | 6.500 | 4.000 |
| K. Waarey | 25.000 | 13.000 | 8.000 |
| Dujuuma | 50.000 | 22.000 | 13,000 |
| *Wadar Guud* | *104.000* | *41.500* | *25.000* |

Waxaana muuqda in ay Sablaale ugu dad yartahay xagga tirada dadka shaqeeya saacadda dhan iyo saacadaha dheeraadka ah oo aad mooddo in ay ka dhalatay dad yari inkasta oy ku nool yihiin halkaa dad tiradooda guud ahaan ku dhow yihiin 29.000 qof hase ahaatee waxaa ku badan dadka da'doodu ka yar tahay 15 jir, waayo waxaa lagu qiyaasay da'da dadka la doonayo in ay shaqeeyaan saacado buuxa ragga 15 — 55 sano haweenka 15 — 50 sano, haddii aanay haysan haweenku carruur ka yar 12 — 15 sano iyo ka hoos hawsha joogtada ah ee maalinnimo wax bay ka gelayaan. Dadka wixii ka weyn 55 sano waxaa loo dhiibayaa hawl fudud.

Shaqada xilliguna waxay ku aaddan tahay marka beeraha la goynayo iyo xilliga abuurka, sida caadada ah, halkii han yahay 1 iyo nus ilaa qof, kan roobka ahina wuxuu u baahan yahay hal qof, waxaana dheer taas rabaynta (Xannaanaynta) digaagga, xannaanaynta xoolaha, waqtiga beerta iyo dhir guridda, hawlaha danwadaagta oo kale sida sameynta waddooynka.

Waxaana cad inay noqon doonaan 3 iyo 4 sano kaddib dadka la dejiyey kuwo aqoon sare u leh hawshooda, hase ahaatee waqtiyadan waxaa loo baahan yahay dad badan oo ka

shaqeeya hawlaha Beeraha ee Beelaha Danwadaagta si looga kabto wax badan oo is dhimi kara aqoonyari darteed.

Waxaanu u soo qaadannay Dujuuma mitaal ahaan habka hawsha lagu qorshyay ilaa 1981ka, iyo wax kasta oo loo baahan doono hase ahaatee 2da kale ee Danwadaagood waxay u habaysan yihiin sida taas loogu qorsheeyay oo kale, sanooyinka soo socda iyadoo loo kala soocay sidii Dujuuma oo kale, sidaa ayeyna ugu caddaaneysaa qof kasta oo daawada habka xilkasnimo ee loogu qorsheeyay fulinta hawlaha Danwadaagaha Beeraleyda, waxaana lagu rajo weyn yahay in ay hirgasho sidii loogu tala galay hawl walba, xagga dadka, dhulka, qalabka iwm.

## BARNAAMIJKA TABABARKA

Si loogu beddelo tobanyaal kun oo qof oo aan wax xirfad ah aqoon xirfooleyaal xoog ah oo si buuxda uga qayb qaata mashruuca degdegga ah ee beera falashada, waxay u baahan tahay arrintaasi in wax kasta laga hormariyo tababariddooda, barnaamijkaasoo loo qaybinayo laba nooc oo kala ah:

a) Kuwo la siiyo tababarro gaar ahaaneed oo laga dooro dadka la dejiyo si ay u yeeshaan aqoon u dhuun daloosha cilmiyo ama farsamooyin gaar ahaaneed.

b) Barnaamij guud ama tababar guud ahaaneed oo la siiyo dhammaan dadka beera falashada hawshoodu noqon doonto.

Tababarrada gaar ahaaneedna waxaa ka mid ah sida wadidda iyo dhawridda makiinadaha iyo qalabka mashaariica loogu qabanayo dadka la dejiyay, waxaa intaa weheliya dadka la dejiyey waxay yeelan doonaan wershado yar yar ah oy ku shaqeystaan, iyagoo cuskanaya dadka beesha gaar ahaan dhar tolidda, kabo sameynta, birtumidda iwm.

Dadka la soo doortay kuwa kartida dheeraadka ah muujiya waxaa la barayaa diyaarinta abuurka, beeridda, beera jaridda, badbaadintooda, waxaa kale oo barnaamijka tababarrada gaar ahaaneed lagu daray taregtar (cagaf-cagaf) wadidda iyo baabuurtaba, kontoroolka waraabinta, xannaaneynta, dhawridda makiinadaha, shaqaalaha ka badbaadiya beerta cayayaanka, xannaaneynta xoolaha iyo digaagga, shaqada caafimaadka guud dhawristeeda, hawsha guriga, umulisanimada, dhar tolidda.

*Barnaamijka tababrka guud*

Waxaa la siinayaa tababar gaaban oo guud iyo casharro hanuunin ah dadka oo dhan gaar ahaan ragga iyo haweenka la doonayo in ay ka shaqeeyaan hawsha beera-falashada, abuurka, carro geddinta, tallaalka, bacrinta iyadoo lagu isticmaalayo filimo lagu tusayo, habka beera falsafada iyo masawirro, amadhulka hawsha ka socota oo tababar hawleed

lagu siiyo si ay uga faa'iideystaan.

Waxaana nasiib wanaag noqday in ay maanta fikrad fiican ka haystaan beera falashada noocyadooda, dadka ku nool Beelaha Danwadaagta Beeraleyda, gaar ahaan dadka qaan gaarka ah oo hawsha isu xilqaamay, waana lib weyn oo ka mid ah libaha laga dhaliyey dadkii la dejiyey carrada cusub ee beeraha ah.

# BARNAAMIJKA BEERAFALASHADA EE BEELAHA DANWADAAGTA BEERALEYDA 1977

*Qorshaha 1977ka Jan. — Maarso*

Waqtigaa isaga ah waxaa isku dubbadhacaya hawlaha Danwadaagta Beeraleyda, iyadoo la qabanayo hawlo badan oo qorshaysan, ha ahaato sii ballaarinta qorsha waraabinta ama kordhinta tacabka iyadoo la ballaarinayo dhulka la beeranayo. Sidaasoo kale waxaa soo wada gaaraya qalabka ay ugu baahan yihiin beer falashada iyo bacrinta dhulkaba.

*1977ka Abriil — Juun*

Saddexda bilood ee ku xigta isla sannadkaa waxaa loogu yeerayaa tartamayaashii qandaraaska dhismaha Biyo Xireenka Sakow ku fuliyaan mashruuca si looga faa'iideysto biyaha webiga Shabeelle oo badda ku shubma, isla bilo kaddib waxaa la dhammaystiri doonaa qorshihii loogu tala galay waraabinta beeraha 3 Danwadaagood ee Kurtun Waarey, Sablaale iyo Dujuuma.

*1977 Oktoobar — Desembar*

1. Qorshaha saddexda bilood — Oktoobar Disembar — hawsha la qabanaya waxaa ka mid ah:

1. Waxaa la sii wadaya tabaabushihii iyo cabbiraadii habkii loo dhaqan gelin lahaa dhismaha biya xireenka Sakow.

2. Waxaa la sii wadayaa qorshihii waraabinta iyo baaridda carrada ee ka socotay 3 Danwadaagood.

3. Waxaa la sii wadaya hawsha indha indheynta tobogaraafiyadda.

4. Waxaa bilaabanaya imaatinka taragtarada iyo qalabka kale ee lagag shaqeeyo beeraha.

BARNAAMIJKA DEJINTA BEELAHA DANWADAAGTA KALLUUMEYSATADA EE XEEBAHA SOOMAALIYA



*Bal barwaaqada baddeenna eega*

Iskaashatooyinka Kalluumeysiga ee laga alkumay xeebaha: BARAAWE, BADEY, CADALE iyo KULMIS.

Waxay ka mid yihiin Barnaamijka dejinta dadka Soomaaliyeed ee abaartu waxyeelleysay 1974-1975, halkaas oo lagu xalliyey dhibaato culus oo wax badan daba joogtay dadka

xoola dhaqatada Soomaaliyeed oo aan kansho u heli jirin in ay kaga fekeraan abaaraha soo noqnoqonaya, sidii ay uga bixi lahaayeen, ama cid kale oo daneysa midna.

Iskaashatooyinka Kalluumeysatada danwadaagta ah oo hadda sida wacan looga hirgeliyey 4ta beelood oo aan kor ku soo xusnay. Iyagoo higsanaya beelaha danwadaagta beeraleyda; oo ay isku fil yihiin; iskuna barnaamij iyo qorshe yihiin, in kasta oo dadkoodu kala badan yahay, waxay gu' jirsadeen bishii Agoosto 20dii 1976, halkaasoo sannad ka soo wareeg ay markii la soo raray oo la dejiyey dadka ku nool hadda danwadaagaha.

Kalluumeysatada Xeebuhu waxay kaga duwan yihiin beeraleyda sida magaca ka muuqata xagga barnaamijka dabeecadda hawlaha oo kala duwan; iyo xirfadaha la baro dadka ama tababarrada la siiyo; si ay ugu fillaadaan hawlaha loo qabanayo, iyo qorshaha loogu sameynayo wax kasta oo horumarkooda ku lug leh, sida qalabka loo gaday (doonyo, maraakiib, huuriyo, shabaag, baroosiyo, qaboobiyeyaal) iwm.

Maalgelinta (investment) loo baahan yahay in wax loogu qabto dadka la dejiyey dhulalka xeebaha ah keliya waxaa lagu qiyaasay So. Sh. 409.979,255, iyadoo kala ah :

72 malyan shilin waa siin hibo ah.

337.979.255 waxaa lagu helayaa deyn muddo 4 sano ah; oo dulsaarkeedu yahay Sh. So. 2% muddada bixinta dayntuna iyo dulsaarku waxay bilaabanaysaa kaddib marka la fuliyo mashaariicda (1980).

Maalgelinta guud ahaaneed ee wax lagu dhisayo (1976-1979) waxay gaareysaa ilaa 1980; Sh. So. 42.648.555.

Waxyaalaha ka soo noqonaya sannadkii Kalluunka ay soo jillaabaan doonyuhu waxay gaarayaan waxa la iibsho lacagtoodu Sh. So. 96.141.827, iyadoo ay ka bilaabaneyso marka hore 20 tan oo kalluun ah; kaddibna sii kordhaysa ilaa uu gaaro 1980; 50 tons.

Marka meeldhexaadka (average) sannadkii lagu daban karo doonti 9 mitir dhererkeedu yahay; waxaa lagu qiyaasay 30 tan, laakiin kaddib markii la siiyo kalluumeysatada tababar 4ta sano ee soo socda muddada hawshu socoto oo la di-

yaariyo teknikada cusub ee kalluumeysiga, isla mar ahaantaana la dhiso saldhigga Raadiyo-is-gaarsiinta oo dhan waqtigaa wax dhibaato ahi kama hor iman doonto doonyaha in ay gaarsiiyaan jillaabsiga ama kalluumeysiga 50 ton.

Waxaana xusid mudan in la tilmaamo in dadka la dejiyey xeebta Kulmis (kudha) ee degmada Badhaadhe raacsan aanay ahayn dadkii cayroobay oo laga soo raray gobollada waqooyi; ee dadku wuxuu yahay kuwo laga soo raray jasiirado yaryar oo kala durugsanaa, kuna yiil Badda Hindiya; iyagoo dadkaasi ahaa kalluumeysato, la soo ururiyey, oo loo sameeyey iskaashato kalluumeysi, halkaasoo dawladdu ku kaalmeynayso in ay u dhisto aqallo, cisbitaallo, dugsiyo, goleyaal hanuunin, masaajidyo, saldhigyo Boolis, iwm. Maxaa yeelay sababta loo soo raray waxaa saldhig u ah daryeelka iyo danaynta dadkaa Soomaaliyeed ee dhibaatooyinka faraha badani haysteen, tallaabadaa kacaannimo ka hor.

## BARNAAMIJKA HORUMARINTA KALLUUMEYSATADA

Waxaa lagu qiyaasay maal-gelinta guud ee loo baahan yahay in lagu fuliyo Barnaamijka dejinta kalluumeysatada lacag dhan 367.3 malyan oo shilin, maalka wax lagu qabanayaana wuxuu dhan yahay 42.6 malyan shilin, waxayna isku noqonayaan 409.9 malyan shilin.

Waxaana ka mid ah siin gaaraysa 72 malyan oo uu dhiibayo USSR, oo dejinta uu siiyay iyo deyn kale oo gaareysa 136 malyan. 40 malyan oo ka mid ah lacagtaa waxay tahay qalab deyn ah (commodity).

Markaa xataa haddii loo leexiyo 136 malyan oo shilin dejina; waxaa misana loo baahan yahay dayn dheeraad ah oo lagu qiyaasay 231.3 malyan shilin. Lacagta guud ee horumarinta meelaha dadka la dejiyey loo qaybiyey waa sida soo socota :

1. EYL, So. Sh. 81.8
2. CADALE, So. Sh. 85.6
3. BARAAWE, So. Sh. 83.5
4. Kulmis-Badhaadhe (Settlement) (Kudhaa) 116.4
Isugeyn So. Sh. 367.3.

Qaybta ugu badan maalka (Xoolaha) wax lagu hormarinayo waxaa wax loogu qabanayaa meelaha soo socda :

1. Doonyo matoorro leh; shebaag wax lagu dabo, Sh. So. 95.5 malyan.
2. Barnaamijka gurya-dhiska So. Sh. 129.9 malyan oo laga sameynayo Eyl, Cadale iyo Baraawe.
3. Beer waraab oo Jamaame laga sameynayo oo u soo saarta (Haruur) ama miro dooro la rabbeynayo la siiyo So. Sh. 52,2 malyan.
4. Qiimaha furdooyin yaryar ku kacayaan oo laga sameynayo magaalooyinka Eyl, Cadale, Baraawe iyo Kulmis, waa lacag dhan 43.4 malyan iyo makiinado, qalab ka kooban qaboojiyeyaal, (Workshops) korontada biyaha, buuntooyin, raadiyaha is-gaarsiinta iwm. lacag dhan 30.0 malyan.

BARNAAMIJKA GURYAHA:

Barnaamijka mashruuca dhismaha aqallada Beelaha Kalluumeysatada la dejiyey wuxuu noqonayaa sidan: (1500 Xaas oo Baraawe guryo looga dhiso); iyo (1300 Xaas oo Cadale;) iyo (1200 Xaas oo Eyl), waxaa kaloo la damacsan yahay in loo dhiso 40 guri jiif oo mid walba qaado 20 sariirood, dadka aan xaaska lahayn, cisbitaal qaada 50 sariirood, dugsiyo, saldhigyo Booliis, gegooyin ciyaareed iyo dukaamo ayaa iyana qorshaha ku jira in laga dhiso 4ta danwadaagood ee kalluumeysatada. Waxaana muuqata in ay ka badan yihiin mashaariicda laga hirgeliyey xeebaha mid kasta oo ka mid ah Danwadaagaha tan iyo intii Kacaanku ku fara yaraystay dhismo mashaariic fara badan oo kale; hase ahaatee waxaa ka sii daran xagga tirabadida tayada faa'iidooyinka ay u leeyihiin bulshada in kasta oo ay qiimo badan ku fadhiyaan waxaa ku weyn ujjeeddada laga leeyahay.

---

*F.G. — Xisaabaha halkan ku qoran waxaan ka hellay Waaxda Istaatistikada iyo Teknikada ee Agaasinka Guud ee Madaxtooyada J.D.S.*

## AQALLO QABOOJIS:

Afar aqal oo wax qaboojiya ama guryo u habeysan si gaar ah oo loogu tala galay qaboojinta Kalluunka laga soo saaro badaha ayaa loo qorsheeyey in laga dhiso 4ta Beelood ee danwadaagta Kalluumeysatada (ay ku jirto Kulmis) iyo 5 aqal qaboojiye oo kale iyo 4 baabuur oo frijiteerro wax qaboojiyaa saaran yihiin ayaa misana loo qorsheeyey in laga sameeyo dhulalka dalka gudihiisa ah ee ka durugsan Xeebaha si loogu iib geeyo halkaa kalluunka; sida Jamaame, Jilib, Dujuuma, Sablaale iyo Kurtunwaarey. Isla mar ahaantaa waxaa lagu tala gelayaa si loo hormariyo kalluunka iibkiisa; dadkana loo baro in dalka suuqyo laga sameeyo sida meelaha Garoowe, iyo Jawhar, taasoo dhalin doonta in ay bartaan cunidda iyo gadashada kalluunka dadka ku nool, magaalooyinka ka durugsan xeebaha oo hadda badankood aaney cunin kalluunka aqoon la'aan darteed.

## DOONYO MATOORRO LEH:

Beelaha Danwadaagta Kalluumeysatada waxay heli doonaan muddada u dhexeysa 1976 ilaa 1978 : 700 oo doonyo matoor leh iyo 20 markab; si ay ku gaaraan horumar la taaban karo, 2 ilaa 3da sano ee soo socda.

Waxaa la soo gadayaa 1976 ugu yaraan 400 oo doonyadood, 300 oo hartayna waxaa la soo gadi doonaa 1977. Waxayna noqonayaan qiyaasta ugu yaraan karta doonyahaas la damacsan yahay in la soo gado; dhererkoodu waa 9, meters, oo leh injiin xooggiisu yahay 60 faras.

Sagaal markab oo mid walba (15 meter dhererkiisu yahay) ayaa loo soo gadayaa 1976.. 5 markab oo mid walba dhererkiisu yahay qiyaas 15 meter ayaa la soo gadayaa 1976, 17 kalena 1977 oo dhererkoodu yahay 15 meter, iyo 15 markab oo dhererkoodu yahay 15 meter iyo 5 marka oo 20 meter dhererkoodu yahay iyo 2 markab oo 25 meter dhererkoodu yahay.

1978 waxaa loo gadayaa Eyl, Cadale iyo Baraawe 3 markab kalluumeysi oo mid walba dhererkiisu yahay 25 meter. Maraakiibtaa waaweyn oo 25m. ahi waxay ka shaqeyn

doonaan Kismaayo iyo dhinaca koonfureed ee furdooyinka hagaagsan leh, waxaana la filayaa in ay hawsha bilaabaan dekedo yaryar iyo kuwo waaweyn oo la sameyn doono wixii ka dambeeya 1978, sababtaa darteed ayaa dib loogu dhigay soo gadidda 3da markab ee waaweyn.

## XILLIYADA KALLUUMEYSIGA :

Xilliyada kalluumeysiga Soomaaliya waxay la socdaan hadba sida baduhu yihiin; xilliyada kulaylka ee khariifka qabowga dayrta, ama xilliyada kalluunka la helo oo uu soo dhowaado iyo waqtiyada uu ka durko xeebaha; isagoo ay saameeyaan xaaladda dabaylaha iyo jawiga is-beddela had iyo gooraale.

Matalan haddii aan ka soo qaadanno xeebaha Bari, sida Badey (Eyl) oo kale xilligu wuxuu socdaa muddo 8 bilood ah laga bilaabo Setember ilaa Abriile sannad walba. Hase ahaatee ayaamaha aan la aadin, badda kaddib markii ay xaaladdeedu xumaato (kacdo) waxay yihiin Desember-Jannaayo iyadoo 120 maalmood la nasto.

## HOBYO ILAA BARAAWE :

Waqtiga kalluumeysigu waa Setember-Abriile, sannad walba. Hase ahaatee tabarta qalabka kalluumeysiga ayaa ka hagaagsan kan lagaga kalluumeysto meelaha hore, xilliga ay dhacayso dabaysha koonfur galbeed, waxaa laga nastaa badda 140 maalmood; sannadkii. Tan kale waa ka fudud yihiin dabaylaha ka dhaca koonfurta Kismaayo kuwa waqooyi; badduna waa ka deggan tahay kana nidaamsan tahay xilliga baddu deggan tahay, dhinacaasna lagama kalluumeysto 160 maalmood sannadkii.

Qalabka kalluumeysiguna waa Huuriyo sixiimado shiraac leh iyo doonyo matoor leh ama maraakiib, yaryar iyo meel dhexaadba leh. Sida la ogyahay doonyaha shiraaca lihi inta ay ku jiraan badda sannadkii waa ka badan tahay kuwa matoorrada leh. Waxaana lagala soo baxaa badda noocyo badan oo kala duwan oo kalluun ah; oo mid walba si gaar ah loogu dhaqmo iyagoo qaarkood la qallajiyo oo dibedda loo diro kuwa kalena laga iibsho suuqyada dalka, waxa kalena la farsameeyo.

Waxaana dhacda in aan sidii la rabay looga faa'iideysan, taasoo ka timid dhibaatooyinka ka dhashay xirfad kalluumeysi la'aanta, ama maqnaasho tabo badan, iyo aqoonta, lagama maanrmaanka u ah kalluumeysiga.


DHIBAATOOYINKA :

Waxaa jira dhibaatooyin ka dhashay xirfad kalluumeysi aqoon la'aanta, taasoo keentay in laga faa'iideysan waayo khayraadka badaheenna yeelkeede, kaddib markii la tababaray dad badan ee ku nool danwadaagaha kalluumeysatada, waxaa la filayaa in ay wax isbeddelaan..... waxaana sii kaalmeeyey oo hoos u dhigay kalluumeysiga cunid la'aanta dad badan oo ku nool magaalooyinkeenna ama qalab habboon oo ku filan la'aanta iyo hab kalluumeysi oo casri ah oo aan dadku aqoon; waxaana ka sii daran koobnaanta suuqyada gudaha ee kalluun iibinta dalka, taasoo ka dhalatay dhiirrigelin la'aanta jirtay Kacaanka ka hor.

Waxaana lagu rajo weyn yahay in ay wax weyni iska beddelaan arrintaa; kaddib markii la sameeyey Wasaarad u qaabbilsan dalka fulinta siyaasadda kalluumeysiga iyo horumarinta xeebaha, iyo Wakaaladda mas'uulka ka ah horumarinta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada oo giddigood wada danaynaya sidii looga faa'iideysan lahaa xeebteenna dhererkeedu gaarayo 3.333 mayl badeed.




*Jaalle Siyaad oo waraysanaya shaqaale beero diyaarinaya*



*Jaalle Siyaad iyo Niyreere waxey daawadeen dhismaha aqallada Danwadaagaha ee Kurtun Waarey Beelaha Danwadaagta*



*Jaalle Siyaad oo Sablaale booqasho ku tegey*



*Guddoomiyihii hore ee Beelaha Danwadaagta oo khudbad u jeedinaya dadkii la dejiyay*

# HABKA MAAMULKA BEELAHA DANWADAAGTA BEERALEYDA IYO KALLUUMEYSATADA

Marka aan ka hadleyno Maamulka Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada waxaa lagama maarmaan noqonaya in dib loogu noqdo - gadaal - waqtigii uu bilawday nidaamkaasi; habka uu ku bilawday, heerarka uu soo maray, iyo habka lagu maamulo waqtigan dadka la dejiyey Beelaha aan tilmaannay; waxyaabaha saldhigga u ah; shuruucda iyo xeerarka habeynta beelahaas, iyo xiriirka u dhexeeya madaxda beelaha maamusha; iyo dadka ku nool Beelaha Danwadaagta ama amarradii iyo wareegtooyinkii ka soo baxay sidii loo maamuli lahaa dadkii tabaaloobay, sidii loo soo raray; habkii lagu dejiyey, siyaabaha ay ku dhaqmaan hadda iwm.

Maamulka dadka la dejiyey dhulalka xeebaha ah iyo beeraha wuxuu la bilawday xarumihii gargaarka Abaarta loo sameeyey 1974kii, kaasoo ahaa mid ku habeysan mintid, dadaal isku dubbaridan una adeegaya gargaarka iyo daryeelka dadkii tabaaloobay; amase wax u qabashada ummadda abaartu dhaawacday; iyadoo ku hubaysan fikrad ah «Badbaadin wax kasta oo la badbaadin karo», waxaana lagu fulin jirey wax kasta waqtigaa amarro tilmaamaya habkii wax loogu qaban lahaa dadkaa iyadoo ay arrintu dad badan ku cusbayd, ama ku cuslayd yeelkadeede wareegtooyinkaa ka soo bixi jirey Xarunta Dhexe ee Gargaarka, abaarta ayaa waxay u ahaayeen dadka goobaha hawlaha ka wada; tilmaamo iyo tusaalooyin ay raacaan, iyadoo ay ahayd arrintaasoo kale mid aad u adag, oo aan iyada oo kale soo marin dalka; ama aan laga helin waaya-aragnimo dalal kale oo sideenna oo kale u maamulay dad abaaro dhibaatooyin iyo dhaawacyo gaarsiiyeen; sidaa daraaddeed ayey ahaayeen tallaabooyinkii laga qaaday arrintaa oo dhan kuwo ku socday, geesinnimo, xilkasnimo, waddaninimo iyo kacaannimo. Wuxuuna u qaybsanaa: Gargaar daawo, Biyo iyo Raashin siin, Aqallo u dhisid, u soo Daadgurayn Reer Baadiye meelaha looga sameeyey xeryaha gargaarka iwm.

Waxaana hawsha faraha ku hayey, shaqaale dawladeed oo looga dooray; Ciidammada Qalabka Sida, Ardeyda Shaqada Qaranka ee O.H.R.M. ka qayb qaatay, Guulwadayaal, iyo dadweyne fara badan.

DHISMO GUDDIYO:

Waxaana isla mar ahaantiina ka dhismay xarumaha Gargaarka Abaarta guddiyo ka mas'uul ah maamulka xeryaha, xagga aqallo dhiska, raashin u qaybinta, biyo dhaaminta, daaweyn, taakulayn, hanuunin, nadaafad dhawrid, nabadgelyada iwm. si wacan ayeyna uga soo dhalaaleen hawlihii loo xil saaray oo dhan, iyaga ruuxaddooda ayaana faraha ku hayey waqtigii kala guurka ee dadka qaarna miyiga ku noqdeen, kuwa kalena la soo rarayey.

Hase ahaatee dejinta dadkaa waxaa la bilawday hab cusub oo wax lagu maamulo iyadoo loo qaybiyey meelihii dadka la dejiyey Degmooyin, oo mid kasta loo magacaabay guddoomiye degmo iyo guddi hawsha la fuliya oo isugu jira shaqaale iyo dadweynaha la dejiyey ilaa xilkii hawlaha la qabanayo lagu wareejiyey dadkii la dejiyey beelaha danwadaagta oo hadda si fiican u maamula wax kasta oo ku saabsan danahooda.

Dejinta kaddib waxaa loo beddelay magacii guddidii Gargaarka Abaarta ee maamulka faraha ku haysay; Guddiga Barwaaqaynta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada.

Taasoo gacanta ku haysa maamulka guud ee 6da Beelood oo la kala dejiyey dadka, kaasoo kala ah: Xeebaha Baraawe, Eyl, Cadale — Beeraha: Kurtunwaarey, Sablaale iyo Dejuma.

Waxaana ku xigay habkii maamulka gargaarka dadkii abaarsaday oo isaguna isbeddelay hoosna u degay sida aan halka ku arki doonno, iyadoo beel walba laga dhisay Guddiyo kala sarreeya oo hawshu u qaybsan tahay, dadka la dejiyeyna laga soo qaybgeliyey talada maamulka danahooda. Guddiduna waxay gaarayaan ugu yaraan 7 guddi iyagoo kala ah :

1. Guddiga Maamulka Degmada.
2. Guddiga Sare ee Nabadgelyada Degmada.
3. Guddiga Shirarka iyo hadal qoraalka.
4. Guddiga Maamulka Dhaqaalaha iyo Tirakoobka.
5. Guddiga nidaamka Nabadgelyada iyo aqoonsiga dadka.

6. Guddiga Caafimaadka iyo Caado baridda.
7. Guddiga Horumarinta Tacabka.

Guddi walibana wuxuu leeyahay waajibaad uu fuliyo oo loo xilsaaray si aaney hawluhu isugu labmin; halkanna waxaan ku soo guurineynaa noocyada guddiyada, waajibaadyada iyo sida ay u kala duwan yihiin:

## MAAMULKA DEGMOOYINKA DANWADAAGTA

Abaabulidda degmooyinka Danwadaagaha oo ah tallaabo geesinimo ah oo Kacaanku u bareeray, waxaa lagama maarmaan ah in dadka maamulka degmooyinkaasi ay ahaadaan shaqaale lagu soo doortay:

1. Kacaannimo;
2. Naftii-hurenimo;
3. Waxtar (attivo).

Haddaba si loo helo maamul isku xiran, waxqabad leh (dinaamic), waxaa shaqaalaha degmooyinkaasi loo xilsaaray ay noqon doonaan, inta ay degmada joogaan, kuwa toos ahaan ugu xiran :

1. Mushaharkooda lagu wareejiyo degmooyinka Danwadaagta;
2. Fayl (Files) shaqadooda ku saabsan uga furan tahay;
3. Beddelkooda (ugu yaraan shaqaaluhu waa inuu degmada ka shaqeeyo 6 bilood haddii aan la dhaliilin) iyo fasaxooda oo laga maamulayo.

## DHISMAHA GUDDIGA MAAMULKA DEGMADA

1. Nooca Guddiga Maamulka Danwadaagta:

Guddiga ka dhisan degmooyinka Danwadaagta, waa guddi xubnihiisa loo baahan yahay in ay ahaadaan kuwo garaadkooda siyaasiga ahi aad u sarreeyo, kana fog awood jeclaysi iyo isumuujin nifaaqeed (ipocrasia). Guddigu waa inuu ku shaqeeyaa iskuduubnaan, dood dhisma ah, muujaamala la'aan oo maamuus iyo ismaqal ku dhisan.

2 Xubnaha Guddiga:

Guddiga Maamulka Degmooyinka Danwadaagta oo guddoomiyaheeda lagu magacaabayo Dekreeto Madaxweyne, waxaa xubin ka noqon doona wakiillada Wasaaradaha:

1. Beeraha ama Kalluumeysatada;
2. Waxbarashada iyo Barbaarinta;
3. Hawlaha Guud;
4. Caafimaadka;
5. Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;
6. Xafiiska Abaabulka X.H.K.S.
7. Ciidanka Booliiska;
8. Ciidanka Nabadsugidda;
9. Beel daajiyayaasha oo ka qayb galaya shirarka caadiga ah.

GUDDIGA SARE EE NABADGELYADA DEGMADA

b) Guddoomiyaha Degmada, Wakiilka X.H.K.S., Taliyaha Saldhigga Booliiska iyo Wakiilka Nabadsugidda, waxay ka dhisan yihiin Guddiga Sare ee Nabadgelyada Degmada.

Guddiguna wuxuu gaar ahaan uga shirayaa arrimaha ku saabsan warbixinta shaqaalaha, nabadgelyada degmada iyo arrimaha Guddiga Nabadgelyda Hoose iyo nadaamka ay xallin waayaan.

SHIRARKA IYO HADAL QORAALLADA

Guddiga maamulka degmada Danwadaagta ugu yaraan, waa in uu shir hadal qoraal (Verbale) leh qabsadaa 48kii saacadoodba mar.

Guddiga maamulka Danwadaagta wuxuu isu qaybinayaa Guddiyo Hoose oo noqonaaya sida soo socota:

GUDDIGA HANUUNINTA IYO WAXBARASHADA:

Wuxuuna ka koobnaanayaa madaxda shaqaalaha Hay'-adaha soo socda :

— X.H.K.S. oo ka ah Guddoomiye;
— Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

Waajibaadka Guddiga:

— Waa inuu abuuraa garasho ku dhisan iskaashi iyo wax wada qabsi iyo midnimo;
— Waa in uu abuuraa garaad siyaasi ah oo ku dhisan Mabda'a Hawl iyo Hantiwadaagga Cilmiga ah;
— Waa in uu abuuraa shucuur dhalisa tartan xamaasad hawleed, garansiisa dadweynaha beeraleyda ah in shaqadu tahay sharaf; dheef iyo raaxana ay ka dambeyneyso.
— Waa in uu habeeyaa nidaamkii waxbarashada khasabka ah iyo kan waxbarashada dadka waaweyn;
— Guddiga maamulka Degmadu waa in uu wakiil uga noqdaa kormeerka hawlaha Guddiyada Hoose ee Danwadaagta.

## GUDDIGA MAAMULKA DHAQAALAHA IYO TIRAKOOBKA:

Wuxuu ka kooban yahay:

— Xoghayaha Degmada;
— Wakiilka Nabadgelayda;
— Taliyaha Saldhigga Booliiska.

Waajibaadka Guddiga :

— Waa in uu sameeyaa buugaag (Registero) u gaar ah qoritaanka, waxa soo gelaya iyo qoritaanka waxa baxaya, raashinka iyo qalabka kaleba;
— Waa in uu habeeyaa, nidaamiyaana habka masruufka Danwadaagta la siinaayo, iyadoo wax kasta lagu bixinaayo warqadda aqoonsiga (Tessera Personale), lambarka Guriga, Buugga Beesha iyo tirada qoyska;
— Waa in uu kormeeraa, xisaabaadkiisana la socdaa Guddiga hilib iibinta, in uu ku dhaqmo habka iyo shuruudaha loo dhigay;
— Waa in uu agaasimaa maamulka dukaamaha iyo baararka ee Degmada iyo Beelaha;
— Waa in uu ilaaliyaa raacitaanka iyo dhaqan gelinta wareegtooyinkii ku saabsanaa raashin bixinta iyo qalabka kaleba;

— Waa in uu u yeeshaa indha-dheeraad ah maamulka makhaasiinnada (Stores) iyo Raashinkaba.
— Waa in uu jiraa hab lagu guddoomayo wixii qalab la keeno magaalada. Taasoo loo sameynayo Buug (Register) lagu guddoomaayo iyo mid lagu bixinaayo;
— Qalab kasta oo magaalada la keeno bixintiisu waa in ay mar walba ka timaaddaa Guddiga Sare;
— Waa in uu hubiyaa in lagu shaqeeyo nidaamka iyo Xeerka maamulka Bakhaarrada qodobka 60aad. Taasoo ah in Guddoomiyaha Gobolka ama Degmada inuu sameeyo Guddi oggoolaansho (an acceptable committee) kharashka ku baxaya dejinta.

GUDDIGA NIDAAMKA IYO AQOONSIGA DADKA:

Guddigaasi wuxuu ka kooban yahay, wakiilka Nabad-sugidda iyo Taliyaha Saldhigga Booliiska.

— Waa inuu ka ilaaliyaa musuqmaasuq iyo wax-isweydaarsi habka maamulka Raashin bixinta iyo qalabka kale ee beeraleyda iyo kalluumeysatada;
— Waa in uu ka ilaaliyaa magaalada dad ku soo gala qaab aan sax ahayn;
— Waa inuu qaban-qaabiyaa, habeeyaana nidaam loogu sameynayo beeraleyda Galal (Files) lagu rido qoyska tiradiisa, magacyadooda iyo masawirkooda.

GUDDIGA CAAFIMAADKA IYO CAADA BARIDDA:

Guddigu wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha, Takhaatiirta iyo Shaqaalaha Wasaaradda Caafimaadka.

Waajibaadka Guddiga :

— Waa inuu u sameeyaa kuna hanuuniyaa dadka la dejinaayo casharro ku saabsan ka hortagga cudurrada ku badan degaanka sida: kaneecada, kaadi-dhiigga, T.B. (Qaaxada) iyo wixii la mid ah;
— Waa inuu habeeyaa kuna hanuuniyaa horumarinta nadaafadda guud ee magaalada Beeraleyda;
— Waa in uu hubiyaa in beel kasta ay leedahay meel qashinka (wasakhda) lagu uruuriyo laguna qubo.

Aqallada hortooda waa in la dhigaa weel lagu uruuriyo.

## GUDDIGA HORUMARINTA TACABKA :

Guddigu wuxuu ka kooban yahay:

— Wasaaradda Beeraha ama Kalluunka;
— Wakiilka X.H.K.S.;
— Wasaaradda X. Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Waajibaadka Guddiga :

— Waa in uu abuuraa tababarro lagu baraayo Beeraleyda cilmiga beeraha sida wadidda cagaf-cagafta iyo ku shaqayntooda hagaajinta kanaalaha iyo waraabinta, baridda habka tacabka galleyda, meseggada, sisinta, khudaarta iwm;
— Waa in uu sameeyaa tababarro lagu barayo Kalluumeysiga, shabagga, wadidda doonyaha, hagaajinta matoorrada, dabbaasha iwm.;
— Waa in uu abuuraa aqoon qeexeysa beeridda dhulka iyo kalluumeysiga in ay tahay nolosha mustaqbalka danwadaagaha iyo ummadda oo dhan;
— Guddi kasta oo guddiyadaa ka mid ah wuxuu ka koobnaan doonaa madaxda shaqaalaha Wasaaradaha, Wakaaladaha, Ciidammada Qalabka Sida iyo dad ka tirsan dadweynaha beeraleyda magaalada, wuxuuna la shaqeynayaa guddiyada hoose ee danwadaagta ee xubinta, cududda, birjeexda, bulshada iyo beesha.

## DHISMAHA DANWADAAGTA:

Ujeeddada laga leeyahay degmooyinka danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada waa in la abuuro bulsho cusub oo muruq maal ah oo la doonayo in la gaarsiiyo isku filnaansho xagga nolosha, waxaana lagama maarmaan ah in degmooyinkaas si ay ku dhisnaadaan loo abuuro hab danwadaag ah (Comunitario) oo cad oo aan isbedbeddel lahayn, si dadka danwadaagta ah ay u helaan fursad ay isku aqoonsadaan, kuna qiyaasaan itaalkooda iyo waxtarkooda, uuna ku dhaqan galo iskaashi.

Sidaas awgeed danwadaagta waxaa ka qayb geli kara:

1. Dadkii asalka ahaa (Original) oo laga soo daad-gureeyey xeryihii Gargaarka (Campi di soccorso), «Abaarta Ceymis» oo waraaqo rasmi ah (Documents) lagu soo dejiyey.
2. Qoysaskii loo aqoonsaday in «Abaarta Caymis» ay, si dadban (Indirettamente) u cayreysay. Kuwaas oo lagu oggolaan karo, si gaar ahaaneed (Special Case), waana:
   b) In ay leeyihiin dad xoog leh oo tacabka Danwawadaagta qayb waxgal leh (attivo) ka qaadan kara;
   t) In uu oggolaanshahooda soo habeeyaa, soona oggolaadaa Guddiga Dhexe ee Barwaaqeynta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada.

Sidaasoo kale waxaa loo oggol yahay in degmooyinkaas ay ku biiraan tuulooyinka yaryar oo ay deggan yihiin beeraley ama iskaashatooyinka Kalluumeysatada oo aan isku filleyn.

Dadkaas kor ku tilmaaman oo keliya ayaa danwadaagta ka mid noqon kara, kuna soo hoyan kara degmada Danwadaagta uu ka tirsan yahay. Waxaana u oggolaan kara guddiga Dhexe ee Barwaaqeynta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada oo keliya.

## DHISMAHA GUDDIYADA DADWEYNAHA:

Si dadka danwadaagta loogu sii diyaariyo si ay iskaga filnaan lahaayeen xagga maamulka, waxaa laga dhex dhisay Guddiyo Hoose ee ku dhisan sida hoos ku qoran:

1. XUBIN:
   In dadka Danwadaagta ihi la isugu uruuriyo toban toban qoys oo isku dheri iyo isku hawl noqda. Waxaana lagu magacaabaa XUBIN.
   Xubinta waxaa u madax ah DABSHID oo ka mas'uul ah agaasinka arrimaha tobanka qoys.
   — Diiwaan gelintooda iyo tirakoobkooda.
   — Qalqaalada iyo habeynta noloshooda: cunno, qalab hu' iwm.
   — Caafimaadka iyo nadaafadda xubita, shaqa gelintooda.

Maamulka xubinta waxaa loo xilsaaray guddi ka kooban 7 ruux oo keli ah, lana kaalinayo, iskana kaashanaya, dabshidka fulinta hawshiisa.

1. Dabshidka (Guddoomiye).
2. Madaxda lixda guddiyada Hoose ee xubinta Guddiga Hanuuninta iyo Waxbarashada, Guddiga Nidaamka, Nabadgelyda iyo Aqoonsiga dadka.

Guddiga Caafimaadka.
Guddiga Tacabka.
Guddiga Dhaqaalaha.
Guddiga Dhismaha.

2. CUDUD:

Shantii xubnood (50 qoys) waxay dhisayaan cudud oo maamulaya Guddi lix qof ka kooban :

1. Taakuliye, Guddoomiye.
2. Madaxda 5ta xubnood oo ay cududdu ka dhisan tahay, waxaana saaran mas'uuliyadda 5ta xubnood isuduwiddooda (coordination), iyo taakuleyntooda.

3. BIRJEEX :

Labadii cududood waxay dhisayaan hal birjeex (100 qoys), waxaana maamulaya guddi 3 qof ka kooban.

1. Tala wade, Guddoomiye.
2. Madaxda labada cududood oo taakuliyaalka ah oo birjeexdu ka dhisan tahay.

4. BULSHO:

Labadii Birjeexna waxay dhisayaan hal Bulsho (200 qoys), waxaana maamulaya guddi 3 qof ah.

1. Bulsha wade, Guddoomiye.
2. Madaxda labada birjeex oo bulshadu ka dhisan tahay oo tala-wadayaal ah.

5. BEEL:

Waa heerka ugu sarreeya ee qaybaha degmooyinka Beelaha Danwadaagta, waxayna ka kooban tahay laba Bulsho (400 qoys), waxaana maamulaya guddi 3 qof ah.

1. Beeldaaje, Guddoomiye.
2. Madaxda labada bulsho ee beeshaasi ka kooban tahay oo bulsho wadayaal ah.

Iyadoo la tixgelinayo qoysaska degmooyinka Danwadaagta oo tiradoodu aan isla'ekeyn waxaa :

Qoyska lagu qiyaasay laba ilaa toban ruux inta u dhaxaysa. Waxaa kaloo degmooyinka fursad loo siiyey in beelaha iyo xubnahoodu ay ku qaybsadaan qoysas amase tirada dadka u dhaxeeya inta loo xaddiday, waana sida hoos ku qoran:

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | XUBIN | 10 | Qoys | ilaa | 100 | Ruux |
| 2. | CUDUD | 50 | » | » | 500 | » |
| 3. | BIRJEEX | 100 | » | » | 1000 | » |
| 4. | BULSHO | 200 | » | » | 2000 | » |
| 5. | BEEL | 400 | » | » | 4000 | » |

Haddii aan mitaal ka soo qaadno, in degmo ayan u qaybsami karin Bulshooyin ka koobanta laba laba boqol oo qoysas, waxaa la qaadan karaa tirada qoysaska oo dadkoodu isu gaari karaa ilaa 2000 ruux, amase wax ku dhow. Qayb kastana sidaasoo kale ayaa loo dhaqan gelin karaa.

Guddiyadaas waxaa ka dhexeeya wada shaqeyn joogta ah, iyagoo hoos ugu dhaadhacaya, ilaa maamulka guddiyada xubinta ee tobanka qoys; hirgelinta arrintaasina (Organizzazione) Guddiga maamulka ee Degmada waxaa uga mas'uul ah wakiilka X.H.K.S. iyo Guddigiisa ee degmada oo xiriir toos ah la leh xubnaha kale ee guddiga si loo fuliyo hawlaha kala geddisan oo degmada ka socda.

Guddiyada Hoose ee Danwadaagta waxay ku dhisan yihiin habka wareegaaleysiga oo ku habaysan in bil walba la cusbooneysiiyo xilka maamulka Beelaha iyo xubnaha Danwadaagta, iyadoo lagu dhaqan gelinayo, sida soo socota :

1. Dabshidkii muujiyey bisha gudaheeda karti dheeraad ah, waa in loo dhiibaa xilka cududda uu ka tirsan yahay.

2. Sidaasoo kale, taakuleyaasha, tala-wadayaasha iyo bulsha-wadayaasha, sida ay u kala karti badan yi-

hiin ayey u kala qaban doonaan, xilka tala-wadayaasha iyo beel-daajiyayaasha ee bisha xigta.

3. Beel-daajiyayaashu waxay soo bilaabi doonaan xilka dabshidka, waxaana loo magacaabayaa xubin ka baxsan beeshiisii hore.

## CIIDAMMADA KA QAYB GALAY DEJINTA:

Waxaa si buuxda uga qayb galay hawlihii Raridda iyo Dejin a Ciidammo badan oo kala duwan oy ka mid ahaayeen:

### 1. LAAN-QAYRTA CAS :

Dhallinyarada Laan-qayrta Casi waxay uga shaqeeyeen hawlaha Gargaarka Abaarta, Raridda iyo Dejinta si xammaasad leh oo aan kala go' lahayn, iyagoo aan wax abaalgud ah lagu siin, isla mar ahaantaana muujiyey xilkasnimo iyo hawlkarnimo dheeraad ah.

### 2. DHALLINYARADA SHAQADA QARANKA:

Waxay noqdeen Horseed lagu daydo oo kaalin wacan ka qaatay wax u qabashadii dadkii Soomaaliyeed ee dhibaatada abaartu gaartey, iyagoo ka qayb galay hawlihii Ololeyaashii daryeelka dadka, wax baridda, gargaarka iyo dejinta, waxayna la joogeen ilaa ay qaayibeen dhulkii cusbaa oo la dejiyey dadkii tabaaloobay.

### 3. TAKHAATIIRTA :

Takhaatiirta Soomaaliyeed waxay muujiyeen waddaninimo, hawlkarnimo, kacaannimo dheeraad ah iyagoo ka soo dhalaalay hawlo aad u adag oo ka hor yimid, ama wax badan ka qabtay dhibaatooyin la'aantood dhaawacyo gaarsiin lahaa dad badan oo Soomaaliyeed markii abaartu dhacday.

Waxayna ugu mahadnaqday dawladda Soomaaliyeed Takhaatiirteenna iyo Kaaliyeyaashooda si rasmi ah, hawsha qiimaha leh oy u qabteen ummaddooda, waqtigii ku habboonaa, kooxihii wax ka dejiyey, dalkana iyaga ayaa ugu dhib badnaa.

### 4. CIIDAMMADA QALABKA SIDA :

Ciidammadu waxay qabteen hawlo adag, oo badan, waqtigii xumaa ee Abaarta iyo waqtigii lagu jirey hawlaha Raridda iyo Dejinta, culeyska weynna wuxuu ku dhacay iyaga, waqtigii raridda iyo dejinta, hawlahooduna aad ayey u tilmaannayeen, natiijooyin fiicanna dhaliyeen.

5. SHAQAALAHA:

Shaqaalaha Dawladdu hawlaha ay ka qabteen Raridda iyo Dejintii ma aha wax la qiimeyn karo, ama la qiyaasi karo waayo waxay isku dareen HIIL IYO HOOBA, aad ayaana loogu mahad naqay dadkii ka qayb qaatey hawlaha Ololaha dejita oo dhan meel ay joogaanba.

6. JAAMICIYIINTA :

Dhallinyarada Jaamiciyiintu waxay ka qayb galeen markii u horreysay hawlihii Raridda iyo Dejinta, iyagoo ka qaatay kaalın wacan ama muujiyey karti ay ku mutaysteen tixgelin iyo ammaan.

7. GUULWADAYAASHA :

Sidaas oo kale ayey dhallinyarada Guulwadayaashu uga qaybqaateen hawlihii Raridda iyo Dejinta, waana la ammaanay kaddib markii loo bogay hawshooda.

8. DADWEYNAHA :

Waxaa si buuxda uga qaybqaatey oo aan hagrasho lahayn dadweyne mutadawiciin ah oo hawlihii Raridda iyo Dejinta si wacan ugu guntaday, ama u huray walaalahoodii dhibaatadu gaartay ee la soo raray, wax badan oo xoolo ahna u hadiyadeeyey markii la dejiyey, magaalooyinka dalka oo dhanna waxay dadweynuhu uga ururiyeen, dadka la dejiyey Beelaha Danwaadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada, dhar, maacuun, xoolo nool, lacag iyo wax kasta oo kartida qofku awooddo.

# DHISMAHA WAKAALADDA BEELAHA DANWADAAGTA

Beelaha Danwadaagta waxaa maamulkooda guud faraha ku hayey Guddiga Barwaaqeynta Beelaha Danwadaagta Beeraleyda iyo Kalluumeysatada oo xaruntoodu tahay Muqdisho, Xghaynta Guudna ay ku dhafnayd wax badan maamulka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Halkaasoo ay ku fulayeen hawlaha degdegga ah ee la xiriiray barnaamijka dejinta. Fulinta mashaariicda halkaas laga fulinaayey waxay ku kala baahsanaayeen Wasaaradihii iyo Hay'aadka kala duwan oo ku shaqo lahaa.

In kastoo dadaalka iyo isxilqaanku badnaa, kartiduna dheeraad ahayd, haddana kala oroddadii iyo degdeggii hawlaha dejintu waxay dhaliyeen dhibaatooyin xagga qorshaha iyo natiijad oo aan la ekayn majhuudka (effort) hawlahaas laga geystay.

Barnaamijkaa weyn ee dejinta oo Dawladda Soomaaliyeed ku maamushay xilkasnimo iyo qorsho taabbagal ah, ayaa aragtida iyo ra'yiga caalamka u soo jeedisay; taasoo keentay in Hay'aadka iyo Bankiyada Adduunku ay u soo fidiyaan kaalmo lacageed iyo mid deyn ahba oo lagu dhiso beelaha Danwadaagta ama loogu fuliyo mashaaricda ka socota.

Maamulka Hawshuna waxay ka kala socotay dhawr heyaadood oo ku kala hawl lahaa barnaamijka dejinta, hase ahaatee wixii ka dambeeyey 1da Luulyo 1976 kaddib markii la dhisay X.H.K.S. isbeddel yar ayaa ku dhacay habka maamulka danwadaagta dhinaca wax soo saarka, kaasoo ah, in ay hoos timaaddo qaybta beeraleyda ee danwadaagtu Wasaaradda Beeraha, qaybta Kalluumeysatada xeebuhuna in ay hoos timaaddo Wasaaradda Kalluunka, laakiin ay isku xirto Wakaaladda beelahaas, dhinaca raashin siinta iyo maamulkooda guud, waxaana madax iyo ku-xigeenno looga dhigay rag ka tirsan Guddiga Dhexe ee XHKS.

Haddaba si Hawshu isku meel uga sobaxdo iyo taladuba waxaa lagama maarmaan noqotay in la dhiso hay'ad taasoo.

1. U gacan banaan dhismaha, daryeelka danwadaagta iyo

fulinta mashaariicda ka socota beelaha danwadaagta beeraleyda iyo Kalluumaysatada.

2. Lehna shakhsiyad qaynuuni ah oo ay kula macaamisho hay'aadka kale ee aaduunka iyo Bankiyada caalamiga ah, iyadoo ka wakiil ah beelaha danwadaagta.

Guddiga Sare ee Dejinta iyo Horumarinta Beelaha Danwadaagta.

Mar haddii Wakaaladda loo dhiibay maamulka iyo Horumarinta beelaha Danwadaagta kuma dhismi karto habkii caadiga ahaa ee Wakaaladaha, sababtoo ah :

a) Fulinta barnaamijka beelaha danwadaagtu waa hab cusub oo lagu tijaabinaayo siyaasadda Hantiwadaagga oo aynu jideysannay si ummadda looga xoreeyo dhaqammadii xumaa oo nolosha dib u dhigaayey kuwaasoo laga dhaxlay Gumeysiga.

b) Fulinta barnaamijku wuxuu u baahan yahay awood heer ummadeed ah, (National level), wuxuuna saameynayaa hay'aad la siman Wakaaladda ama kuwa ka heer sarreeya.

Sidaas awgeed waxaa loo baahan yahay, Wakaaladdu iney heshaa awood sare oo siineysa karti ay ku fuliso hawlaha horumarinta ee loo xilsaaray, middaas yaana dhalisay in la dhisay guddiga sare ee Dejinta iyo Horumarinta Beelaha Danwadaagta oo ka kooban Xildhibaanno ka tirsan Guddiga Dhexe ee XHKS, maamulka Wakaaladduna hoos yimaado.

Guddigaas Sare oo heer qaran gaarsiisan waxaa u dheer wax ka qabashada dhibaatooyinka dabiiciga ee dalka la soo derista· uddiguna wuxuu leeyahay tabar xoog leh oo uu wax kaga qabto dhibaato kastoo timaadda.

*J. Guddiyada Beelaha Danwadaagta*

Waa xubinta ugu muhiimsan oo lagu fulinaayo mashaariicda danwadaagta maadaama dadka danwadaagtu ay yihiin kuwa loo abuuray mashaariicda, si ay uga kaaftoomaan noloshii reer guuraanimada ahayd oo maalin ku noolka (daily-life) ahayd, kuwaasoo loo habeeyay guddiyo kala sarreeya oo ay kaga talinaayaan aayaha noloshooda iyo danahooda, iyagoo lala doonaayo inay la wareegaan maamulka heer kasta ha noqdee mustaqbalka.

### *X. Guddiyada Degmooyinka Beelaha Danwadaagta*

Degmooyinka Danwadaagta la dejiyey waxey yihiin kuwa ka beddelan kuwa caadiga ah xag maamul; xag bulsho iyo siyaasadeedba, sida kor lagu soo sheegayna waxaa loo qorsheeyey dadka danwadaagta iyagoo guddiyo u qaybsan, iney ismaamulaan. Waxaase jirta in khibraddii iyo farsamadii uu maamulku u baahnaa ay ka maqan tahay ilaa hadda.

Sidaas awgeed waxaa loo dhisay guddi ka kooban madaxda laamaha shaqaalaha dawladda oo hawl-wadeenna ka ah fulinta mashaariicda iyo barnaamijyada ka socda danwadaagta waxaana lagu magacaabay Guddiga Degmada Beelaha Danwadaagta. Waxaana Guddoomiye ka ah qof uu Madaxweynuhu xeer ku soo magacaabo.

Guddigaasoo uu hoggaaminaayo kuna gardaadinaayo habka maamulka, dhabbana u jeexaaya sida danwadaagtu u gaari lahayd isku filnaasho maamuleed.

Si taa lagu gaaro waxaa xubno guddigaas looga dhigay madaxda guddiyada hoose ee beelaha, si ay uga qayb galaan shirarka, waayo-aragnimana ugu yeelan lahaayeen maamulka.

Tababarro kala jaad-jaad ah ee maamulka ku saabsan ayaa Ceel Jaalle lagu siiyey, guddiyada laga soo xulay, xarumaha danwadaagta iyagoo la baro sidii ay hawsha u fulin lahaayeen.

### *kh. Ujeeddada Dhismaha Wakaaladda*

Ujeeddada laga leeyahay dhismaha wakaaladda waxa weeye inay xaqiijiso himilooyinka danwadaagtu tiigsanayso, kuwaasoo ah :

1. Mid dhaqan gelisa hab hantiwadaag ah oo abuuraya bulsho isku filan, dadka danwadaagta ahna gaarsiinaya isku fillaansho xag dhaqaale iyo xag bulshaba.

2. Ka qayb gal dhismaha iyo kobcinta dhaqaalaha dalka, iyadoo ku isticmaaleysa qalab iyo maal wixii horumarinta beelaha danwadaagta loogu tala galay si ay u dhaliso mira loogu aayo isku fillaanshaha cuntada waddanka gudihiisa iyo mira dhoofinta oo waddanka lagacta adag (hard currency) soo geliso.

3. Inay danayso xooggana saarto fulinta barnaamijka dejinta, iyadoo u yeeleysa rasmiyaad (documenti) iyo tirakoob (istatistical data.

4. Marxalooyinka la soo maray iyo tallaabooyinka hadba la qaadayo, xagga hirgelinta barnaamijka dejinta, si loo helo qorshaha ugu sahlan oo tusaale u noqda habka dejinta reer miyiga, si adduunweynaha iyo dalka oo dhan looga faa'iideysto; mar haddii (WHBD) aaney hawlaheedu ku koobneyn degmooyinka hadda dhisan oo keliya ee ay dhiseyso degmooyin danwadaag kale oo cusub sida qodobka toddobaad ee sharciga WHBD, baaragaraafka 2aad ku qoran, waxaa lagama maarmaan noqday in loo dhiso xilka cusub.

*D. Xiriirka Wakaaladda iyo Beelaha Danwadaagta*

Qodobka 12aad ee sharciga WHBD, xarafka T, wuxuu leeyahay dadka danwadaagta ahi shaqaale uma noqon karaan WHBD, sababtoo ah, qaybta ay shaqada ka qaadanayaan, waxa weeye mid la xiriirta halka ay kaga jiraan danwadaagta (status personal) waajibna kaga dhigaysa shaqo joogto ah ee horumarinta Beelaha Danwadaagta inay door waxtar ah (ruolo attivo) ka qaataan.

Qof kastana waxaa lagu qiyaasaa laguna abaalmarinayaa hadba sida uu u shaqeeyo, sidaasina waxay ku caddahay qodobka 8aad ee sharciga dhismaha WHBD, xarafka (d); inkastaa xarafka (i) isla qodobkaasi dambe uu daryeelo samafal ah uu u oggol yahay dadka danwadaagta ku jira oo hawlgab ka ah; da'da amase jirro awgeed iyo maatad, sababtoo ah dadka danwadaagta loo dhisaayo, sida la og yahay, waxa weeye dadkii «Abaartii Caymis» tabaaleysay oo gurmad degdeg ah xeryaha gargaarka lagu keenay, iyagoo aan loo fiirin da' iyo xoog ee ay ahaayeen dad lagu wel-welaayey sida naftooda loo bixin lahaa, nolol loogu samayn lahaa.

Marka, haddii dadkii xoogga ahaa lagu waajibiyey shaqo inta aan shaqayn kareynin oo cudurdaarna leh waxay xaq u yeesheen in noloshooda Beesha Danwadaagta oo ay ka tirsan yihiin in ay ballan qaado. Sida loo qaybsanaayo miraha danwadaagta ay dhaliyaan iyo abaalmarinta gaar ahaaneed oo qof waliba ku muteysanaayo shaqadiisa, sida ay dhigayaan qodob-

ka 8aad, xarafka (kh) iyo kan 12aad, xarafka (t) ee sharciga WHBD, xeer u gaar ah ayaa laga soo saarayaa.

*R. Qodobbada Shirciga WHBD*

Sida ku tilmaaman barnaamijka gargaarka, dejinta iyo abuurista beelaha danwadaagta, iyadoo lagu maamuusayo libinta Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ayaa sharciga dhismaha Wakaaladda Horumarinta Beelaha Danwadaagta qodobbadiisii lagu soo fariisiyey kow iyo labaatan (21) qodob.

---

*N. B. — Warbixintii guud ee guddiga B. B. Dan.ta B iyo Kall.satada.*